
JAMHURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta

XAFIISKA MANAAHIJTA

# BARBAARINTA IYO CILMIGA BEESHA

## *FASALKA SHANAAD*



# BARBAARINTA
# IYO
# CILMIGA BEESHA

## FASALKA SHANAAD

## 5

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA



Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre,
Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka ee
Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya

Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan
Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin
ogolaansho

Waxaa lagu daabacay
Madbacadda Qaranka
Xamar, 1976

# TUSMO


Gogoldhig . . . . . . . . . . . . . . 5

— Ururada Ijtimaaciga ah ee Soomaaliyeed . . . . . 12

— Ururka Midowga Afrika (UMA) . . . . . . . 24

— Heerarkii Taariikhda bulshada Aadamiga . . . . 36

— Hantiwadaagga Cilmiga sidee u hirgalineynaa . . 46

— Iskaa wax u qabso . . . . . . . . . . . 50

— Kacaanka aqoonta iyo hiddaha . . . . . . . 59

— Sinnaanta ragga iyo dumarka . . . . . . . 63

# M A H A D N A Q

*Waxaan u mahadnaqaynaa qorayaashii Kitaabkan oo ah: Maxamed Cali Warsame, Cabdirasaaq Cali Cismaan, Faaduma Cali Daahir iyo Cabdiraxmaan Cismaan Saciid.*

*Waxaa kaloo mahadnaq leh dhammaan dadkii kale ee suura geliyey soo saaridda kitaabkan oo ay ka mid yihiin Axmed Sheekh Xuseen oo sawirrada u sameeyey iyo garaacayaashii garaacay.*

**XAFIISKA MANAAHIJTA**

## G O G O L DH I G

Maaddada Barbaarinta iyo Cilmiga Beesha waa maaddo ku cusub Manhajka waxbarashada dalkeenna Soomaaliya. Maaddadu waxay ka mid ahayd arrimihii badnaa ee muhimka wada ahaa ee ka maqnaa waxbarashada iyo Barbaarinta, gaar ahaan, iyo guud ahaan dalka oo dhan Kacaanka ka hor; waxayna la dhalatay Kacaankii 21ka Oktoobar 1969kii. Sababta ay ula dhalatay Kacaanka waxay ahayd; Kacaanka baahi baa dhalisay, keentay, wuxuun u dhashay inuu xaqiijiyo ujeeddooyinka Ummadda, iyo inuu fuliyo barnaamajka loogu tala galay in lagu hirgeliyo ujeeddooyinkaas.

Hirgelinta ujeeddooyinka iyo barnaamijka waxay u baahnaayeen dad runtii gartay oo aaminsan . . . . . . . Dad bahidooda gartay, aaminsan oo u diyaar ah, niyo, garasho iyo falid ahaanba, inay u hawl galaan oo u dhintaan. Taasi waxay u baahan tahay «barbaarin ujeeddo leh». Maaddadaani waxaa weeye jid cusub oo aynu ku doonayno inaan ilmaha ku siinno **ABUUR SOMMAALIYEED**, nuguur (dabeecad) iyo akhlaaq toosan, fikrad horusocod ah, damiir fayow iyo ildheeri siyaasi ah, si ay ku yeeshaan berri qofnimo suuban, waddaninimo, xilkasnimo, dulqaad, iyo dhammaan qiyamka la rabo ee fiican. Maaddadanina waxay inoo horseedaysaa inaan abuurro mujtamac dadkiisu qiyaamkaas leeyihiin.

Runtii, innagu intaas oo dhan ma wada siin karno ilmaha, maxaa jira intooda badan waxay ka mid yihiin nuguurtiisa (dabeecadiisa) asalka ah. Hase yeeshee, innaga shaqadeennu waxay tahay inaan barbaarinno, korrinno, kordhinno oo qaabinno nuguurta uu ilmuhu ku dhashay (in-born qualities). Sida cuntadu, biyahu, qoraxdu iyo hawadu u barbaariyaan (u koriyaan) **Nafleyda** (dadka, xayawaanka, geedaha iwm.) ayey waxbaridda iyo barbaarinta saxa ahi u siiyaan qofka korriimo, caqli, caadifo iyo jir. Macnuhu waxaa weeye, qofnimada waxa isla sameeyaa; nafaqada, aqoonta (barbaarinta) iyo dhaqanka, ama nolosha ku wareegsan ee uu ku dhex nool yahay. Qofnimo waxaan ula jeedna

nuguurta (anshaxa iyo kartida) qofka lagaga sooco dadka kale. Qofnimadu waa sida qofku u dhaqmo iyo siduu u fikaro: waxa la xun iyo waxa la fiican, waxa uu macaansado iyo waxa la kharaar.

Waxaa la yiraahdaa, nuguurta ilmaha marka ay dhashaan waa «dhexdhexaad» (neutral). Laakiin marka dambe waxay u dheeliyaan dhinaca loo barbaariyo inta ay yar yar yihiin. Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa «Carruuri Galo iyo Muslim midna ma aha ee waa kii lagu daraa». Haddaba, waxaa la oran karaa ilmuhu marka ay yar yar yihiin oo ay da'daas ku jiraan (ilaa 9 sano) ayey qofnimadoodu «Tallaalantaa.» Sidaas awgeed, waxaa inala gudboon, haddii aan nahay barayaalka iyo barbaariyeyaalka, inaan xoggeena isugu geyno barbaarinta dhallaanka oo aan ku tallaalo nuguurta iyo tilmaamaha aan la doonayno ilmaha. Taasi waa xilka ay Ummaddeennu innagu aamintay. Maaddadani waa jidka innagu kaalmaynaya sidii aan xilkaas uga soo bixi lahayn.

Waxbaridda iyo barbaarinta waxay goor iyo ayaan yihiin kuwa qofnimada xumaanta ka gooya, uguna beddela wanaag. Waxay siiyaan dadka qalab-mid muuqda iyo mid aan muuqan gayeysiiya inay ku hagaajiyaan noloshooda, kuna daaweeyaan dhibaatooyinka hadba mar la soo gudboonaada, si ay ula socdaan isbeddelka taariikhda. Marka barbaarintu waa mid aannu ku doonayno qofnimo wanaagsan oo karti leh. Waxaa isweyddiin leh qofnimadu ma wax taagan baa? Mase maya? Professor Mauric oo munajim u ahaa wuxuu inoo sheegay «waxa qofka noqonayaa waa inuu noqdaa **«ISBEDDEL SOCONAAYA OO JOOGTA AH.»**

Oo la socda isbeddelka taariikhda. Haddaba waxaa la oran karaa qofnimadu waa isbeddel soconaaya. Isbeddelkaasi sidee u yimaadaa ? Waagii kasta, meeshii kasta, iyo wixii kastaba wax baa kaaga siyaada. Qofkii aad la kulantidba waa kuu adduun cusub! Sidoo kale, shaygii (Miis, matalan) aad aragtidba wuxuu ku siiyaa aqoon hor leh. Haddaba weligaa isbeddel baad ku jirtaa. Qofka gaarka ah iyo aqoonta uu ka helayo dibaddiisa ayaa soo saara qofnimada gaarka ah ee qofka ku jirta. Haddi qof kastaa qof kale

iyo shay kale uu wax ka baranayo, si uu qofnimo gaar ah u yeesho, waxa waajib ah in qof kastaa iyo shay kastaa hagaagsan yahay, illeyn iyagaa qofnimada abuuree.

Danta laga leeyahay maaddada Barbaarinta iyo Cilmiga Beesha waxa weeye in lagu hagaajiyo qofka, qofkuna, markiisa, qof kale iyo shay kale ku hagaajiyo si degaanka oo dhan, dad iyo duunyo, u hagaago.

Qofnimo wanaagsani ma soo baxdo iyadoo aan dibadda laga qorin laga (barbaarin). Qofka waxa dadnimadiisa dhisa macaamilka iyo is-afgaradka uu dadka kale la leeyahay. Macaamilka hagaagsan waxaa abuuri kara (Macallin wanaagsan). Maxaa yeelay, waa macallinka qofka u gudbiya dhallaanka mujtamaca runta iyo qiyamka toosan ee keena macaamilka beesha ee isla noolaanta iyo isjeceylka; qofkuna sidiisa wuxuu u jiraa ama u joogaa kof kale daraadii. Albert Bawbar ayaa arrintaas si cad u dhigay markuu yiri : (I-Thou), «Aniga-Adiga.» Anigu waa adiga, adiguna waa aniga. Anigu waxaan u joogaa adiga daraaddaa, adiguna waxaad u joogtaa aniga daraadday. Adiguna ma jirteen Aniga la'aantay, Aniguna sidoo kale ma jireen adiga la'aantaa! Xikmadaasi qiimo weyn bay inoo leedahay, innaga barbaariyayaalka ah. Maxaa yeelay waxay inoo sheegaysaa in qiimaha qofku yahay qofka kale wuxuu ka helay.

Laba wax oo waaweyn ayaa qofka, gaar ahaan macaallinka, ama dugsiga laga helaa : run cilmi ah iyo qiyam. Cilmigu qofka ma abuuro, laakiin qofka ayaa abuura cilmiga. Qof kasta ma abuuro cilmiga ee waxaa abuuri kara qofka leh qiyamka wanaagsan; tarbiyadduna waa jidka lagu abuuro qof qiyaamkiisu hagaagsan yahay si uu cilmi u sameeyo. Cilmina sidiisa waa la wadaa (value guide). Hadaba maaddada Barbaarinta iyo Cilmiga Beesha waa hooyada culuumta kale. Waxaa la oran karaa culumta kale waxay u shaqaysaa maaddadan, maxaa yeelay waxay dhisaysaa qofnimo, culuumtuna waxay u shaqaynaysaa qofka keena. Taasi waxay run noqon kartaa marka macallinku garto xilkiisa ah tarbiyadda.

Run ahaan, qiyamku ma aha wax guud oo dunidoo dhan ka dhexeeya (Universal). Sababta oo ah mujtamcaadka dadka

dunidu way kala duwan yihiin. Waxyaalaha ay ku kala duwan yihiin waxaa ugu weyn; dhaqanka iyo nidaamka (system) dhaqaalaha. Mujtamac kastaa wuxuu leeyahay dhaqan iyo nidaam dhaqaale oo u gooniya iyo nidaam uu rabo inuu dhaqaalihiisa ku dhiso; mujtamac kastaa dadkiisa wuxuu ku barbaariyaa si waafaqsan dhaqankiisa, siyaasadiisa, dhaqaalihiisa, iyo siduu ka rabo aayatiinkiisa dambe. Sidaa daraadeed, innagu waxaan leenahay dhaqan gaar ah (Islaami ah) iyo nidaam aan doonayno inaan dhaqaaleheena ku dhisno (Hantiwadaag) iyo ujeeddiiyin fog.
Maaddada Barbaarinta iyo cilmiga beesha waa inay noqotaa mid waafaqsan oo u shaqaysa dhaqankeenna, siyaasaddeenna, dhaqaaleheenna iyo ujeeddooyinkeenna fog fog.

Maaddadan marka la dhigayo, ee ilmaha la barayo, waa inaynan ku koobnaan casharada Buugga ku qoran oo keliya. Mar kasta waxaa soo kordha arrimo cusub, waxaa dhaca isbeddel. Waxaa la yiraahdaa «Waagii beryaba geddiisa (Xaalkiisa) leh». Haddaba, waa in ardayda lala socodsiiyaa hadba waxa soo kordha iyo isbeddelka dhaca.
Waxaa kale oo aad wax kuu taraya, haddii aad tahay macallinka, Suugaanta iyo Hiddaha Ummadda Soomaaliyeed. Taas dambe aad bay muhim u tahay, maxa yeelay waxa aad dhaallaanka aaminsiinaysid waxaa ugu weyn dhaqanka iyo danta Ummaddooda. Marka wax kasta oo la barayo waa in lagu baraa ama loogu soo gubbadaa dhaqankooda iyo Suugaantooda, kuwaa oo ah ruuxa ummadda. Ilmuhu waa inay noqdaan ruuxa ummaddooda ee dhaqdhaqaaqa, iyo caqligeeda fikira iyo aydiyoolojiyadeeda wax dhista.

Kitaabkani waa kan 5aad ee Maaddada Barbaarinta iyo Cilmiga Beesha, waxaa loogu talagalay Fasalka 5aad, dugsiyada dhexe ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya. Ardayda ku jirta Fasalkaas, da'dooda iyo garashadooduna way yare kortay. Afar sano ayey wax soo baranayeen. Waxaan filaynaa inay akhriska iyo qorista si wanaagsan u yaqaaniin. Waxaa aad u wanaagsan in la siiyo ardayda aqoon guud oo dheeraad ah, aqoon ka baxsan buugga. Waa in lala socodsiiyo ardayda isbeddelka joogtada ah ee ka soconaya dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba, iyadoo loo sharxayo sababta isbeddel kasta keentay iyo waxa ka soo baxay, raadka uu isbeddelku

reebay. Taas faa'iidadeedu waxaa weeye in ardayda garashadooda siyaasiga ahi ay siyaaddo si ay u noqdaan mawaadiniin (citizens) dhab ah. Waxaa kaloo faa'iida weyn leh in la baro doodda, sida laysu cabbiro iyo sida wax laysu dhacsiiyo.

Ardaydu waxay ku soo qaateen fasalladda, 1aad illa kan 4aad casharro ku dhisan qawmiyadda Soomaaliya iyo wadaninimo, mujtamaca siduu isugu baahan yahay, Iskaa wax u qabso, Kacaanka Hantiwadaagga ah iyo Ururka Jaamicadda Carabta. Inta aadan buuggan bilaabin, waxaa wanaagsan inaad u dulmartid ardayda buuggii ka horeeyey kan, khaas ahaan casharada «dhismaha dawladda, Kacaankii 21ka Oktoobar, xuquuqda iyo waajibaadka qofka mawaadinka ah (Citizen) Iska wax u qabso iyo sheekada nafti-hure. Taasi saldhig weyn bay u noqonaysaa ardayda si ay u gartaan buugan 5aad.

Sannadkan, casharrada muqararka ku ah ardayda waa kuwa sahalan oo soo kooban. Waxa ay barayaan sida mujtamacoodu u nidaamsan yahay, siday uga noqon lahaayeen xubno wax tar ah, iyo siduu ku yeelan lahaa tilmaamo wanaagsan: geesinimo, xilkas, waddani, kacaan, hantiwadaag iyo garasho siyaasi ah. Casharrada muqararaka ku ah, waxaa ka mid ah: Ururada ijtimaaciga ah, Ururka Midawga Afrika, Xilliyadii taariikhiga ahaa ee ay soo martay bulshada bani aadanku, hirgelinta Hantiwadaagga, iskaa wax u qabso iyo kacaanka dhaqanka iyo hiddaha iwm.

Casharadaas dhammaantood waa muqarar. Waxaa faa'iida badan in casharada qaarkood si ficil ah ardayda looga qayb geliyo. Sida casharrada; Iska wax u qabso, Ururka Uabaxa iyo ardayda, iyo sida barnaamijka ismaqalka iyo ismaamuuska ee daryeelidda dugsiyada looga qayb gelin lahaa ardayda.

Casharrada aan u dooranay buuggan waa kuwo aan ka fogeyn degaanka dabeeciga iyo ijtimaaciga ah ee ardayga. Waxaa loogu tala galay casharraddaas inay ilmaha ku abuuraan geesinimo iyo waddan jecayl, isku kaslooni isla weyni, akhlaaq iyo anshax, kacaanimo iyo hawla jecayl, adkay-

si iyo dulqaad, si uu u noqdo mawaadin suuban oo karti leh, oo ka fakara waddankiisa, ka hor inta uusan ka fakarin naftiisa.

Cashar kasta marka la bixinayo, waxa waajib ah in lagu dhaqmo ama la raaco jidka (Method) soo socda :

1) Marka casharka la bilaabo, ilaa marka uu dhammado, waa in ardaydu si nool (actively) uga qayb galaan casharka, Macallinkana waxaa waajib ku ah inuu ardaydiisa ka qayb geliyo casharka uu bixinayo. Waxaa aad doonaysid inaad ardayda u sheegtid, ama bartid, marka hore, weydii ardayda . . . ka doon jawaabta inay helaan dabadeedna si tifaftiran ugu sharax.

2) Isku day inta aad kari-kartid in casharku noqdo mid xiisa leh oo ardaydu aynan ka xiiso dhicin. Haddii ardaydu cuqdo ka qaado waa ka xiisa dhacayaan casharka iyo xataa adiga baraha ahba. Weligaa kici xiisaha ardayda, shuqli ardayda oo maskaxdooda ka shaqaysii.

3) Waxaad ardayda xiisahooda u kicin kartaa, casharkagana uga dhigi kartaa mid la fahmo oo la yaqaan, marka aad isticmaashid qalabka dadka wax lagu baro (Visiual Aids). Ururso marka hore, qalab ku kaameeya, marka aad cashar kasta bixinaysid qalabka kaalmada waa muhim.

4) Cashar kasta fikrad, ama fikrado asaasi ah ayaa ku jira iyo ujeeddooyinka laga leeyahay fikradahaas. Bar ardayda fikradda iyo ujeeddada laga leeyahay. Hubso oo sug inay fahmeen oo qaataan.

5) Casharradu waa inay isku xiriirsan yihiin oo isku dhisan yihiin. Isugu xiji casharrada sida ay isu leeyihiin oo isugu dhow yihiin, isuna raaci karaan.

6) Cashar kasta marka uu dhamaado, waa in ardayda la siiyaa layliyaal ay kaga shaqeeyaan dugsiga dhexdiisa iyo dibaddiisaba. Waxaa jira layliyaal aan ku soo qornay gololo (Mawduuc) kasta dhammaadkiisa, layliyaalkaas waa tilmaan. Isticmaal iyaga iyo kuwo aad ka so dhex saartid cashar kasta.

Waxaan ka cudur-daaranaynaa, haddii ay jiraan wax ge-f:f ah ama nuqsaan ah oo aad ka aragtaan buuggan guud ahaan. Maxaa yeelay shaqada qoraalka buuggu waxay ahayd deg deg, waana markii ugu horreysay oo la allifo buug noocan oo kale ah.

Waxaana waajib ah inaad wixii gef ah ama qalad ah oo aad aragtaan, Jaallayaal, la socod siiya Xafiiska Manaahij-ta, ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.

Waxaan ku han weyn nahay in buuggani noqdo mid dan-tii laga lahaa keena, ardayda Soomaaliyeedna faa'iido u yeesha.

«Ebbe ha inaa waafajiyo»

## Casharka Kowaad

## URURRADA IJTIMAACIGA AH EE SOOMAALIYA

Arar:

Kacaanka ka hor, mujtamaca Soomaaliyeed waa kala daadsanaa, waana isku murugsanaa. Wax xiriir ah ma lahayn, daw (jid) la yaqaana ma haysan. Waa habowsanaa. Mujtamaceenna Soomaaliyeed waa kala qaybsana. Wuxuu u kala qaybsanaa xisbiyo iyo ururro: axsaab, ardo, dhallinyaro, haween, shaqaale, wax lagu magcaabo jamciyado saaxiibnimo, iwm. Dalkeenna Soomaaliya waxaa ka furaa tira ka badan 78 (toddobaatan iyo siddeed) xisbi, wax ka badan boqol urur oo dhallinyaro ah, 32 urur oo shaqaale, tobanyaal haween iyo ardo ah.

Waxaa kaloo jirtey wax lagu magcaabo jamciyado saaxiibnimo oo tira le'eg danjiryaalka (Safaaradaha) Dalkeenna jooga.
Xisbi kasta, urur kasta iyo jamciyad kasta, (90%), waxay ka shaqayn jireen danaha shisheeyaha, ka badan intay ka fakari jireen danaha dadka Soomaaliyeed.

Xaaladdaas foosha xumayd waxay keentay xumaan aad u badan. Waxaanna ugu weynaa xumaantaas inay luntay Jaallanimada Soomaaliyeed! (Pro Somalia). Jaalle Siyaad wuxu yiri :

Maamulkii siyaasiga ahaa ee xumaa dadkii wuxuu u kala qaybiyey : Jaalle Ameerikaan, Jaalle Talyaani, Jaalle Ingiriis, Jaalle Axmaar, Jaalle Jarmal iwm. Waxaa la waayey cid Soomaaliya la jaal ah.»

Ujeeddooyinka ururrada, intooda badan, waxay ahayd khayaano iyo maslaxad ku doon, in la gaaro dana gaar ah. Xukuumaadihii kala dambeeyey wax xil ah iskama saarin danta guud.

Ururrada ujeeddooyinka xumaa iyo xukumaadkii musuqmaasuqa ahaa way wada qaraabsan jireen. M a r k a dadweynuhu iyo xoogagga horusocodka ahi maamulka ay wada canaantaan, maamulku waxu ku dacwin jirey: dimoqraadiyadda ayaan dhawraynaa. Maxay t a h a y dimoqraadiyadday dhawrayeen. Magaca dimoqraadiyadda ayaa lagu qaraabsan jirey.

Qofkii wax xada, ama wax dhaca, ama wax dila, shaqadiisa ka taga lama qaban jirin. Cidina lama hadli jirin. Haddii la yiraahdo ma la qabtaa waxaas, waxay oran jireen; dawlad diimoqraadi ah ayaan nahay.

Qofku waa xor. Dimoqraadiyadda iyo xorriyadda ayaa si xun loogu isticmaali jirey. In kasta oo xaaladu sidaas u xumayd, haddana, waxaa jirtey xoogag shaqaale iyo ardayba lahaa oo horusocod ahaa, had iyo jeerna xumaanta ka dhiidhiyi jirey.

Xoogaggaasi waxay ka dagaallami jireen dulmiga iyo dhibaatada dadka iyo dalka lagu hayo. Laakiin, xoogaggaa horusocodka ahaa waa la caddaadin jirey; waa la ciqaabi jirey, shaqada ayaa laga saari jirey, oo waa la xirxiri jirey.

Wax kastoo xun ayaa lagula kici jirey. Dadka in sidaas loo kala xereeyo ujeeddo ah ayaa laga lahaa. Gumeysigii iyo xukuumadihii dib u socodka ahaa waxay ku dadaali jireen in ay na kala qabiyaan oo na xukumaan. Waxay ka biqi jireen midnimada dadweynaha.

Waxay rumaysanaayeen haddii dadweynuhu isu tago inay awood weyn iyo xoog yeelan karaan. Awooddaas iyo xooggaasna ay ku beddeli karaan wax kasta oo xun, kuna gaari karaan ujeeddadooda.

Isticmaarkii Cusubaa iyo xukumadihii musuqmaasuqa ahaa ayagoo runtaas og ayey waxay ku shaqeeyeen siyaasaddii xumayd ee gumeysiga ee loo yiqiin «QAYBIYOO XUKUN.»

## KACAANKII 21kii OKTOOBAR 1969kii iyo Ururrada ijtimaaciga ah

Kacaanku markuu dhashay arrintaas degdeg ayuu wax uga qabtay. Wuxuu baabi'iyey dhammaan axsaabtii siyaasiga ahayd, iyo ururradii ijtimaaciga ahaa iyo wixii lagu magacaabi jirey jamciyadaha saaxiibtinimada. Sababihii Kacaanku u dhashay waxaa ka mid ahaa inuu wax ka qabto kala daadsanaanta Ummadda, oo uu mideeyo fikradda iyo xoogga dadweynaha. Kacaanka sidiisiba waxa dhaliyey xumaantii jirtey iyo dulmigii buux dhaafka ahaa. Warqaddi ugu horeysey ee kacaanka waxay qoraysey in la baabi'iyo dhammaan axaabtii iyo ururradii ijtimaaciga ahayd ee dalka jirtey. Ujeeddada tallaabadaa loo qaaday waxay ahayd in dib loo dhiso oo loo nidaamiyo mujtamaca Soomaaliyeed.

**Dib u habaynta ururrada ijtimaaciga ah :**

Kacaanku markuu xoogeystey, wuxuu ka shaqeeyey siduu u nidaami lahaa dadka Soomaaliyeed oo xoogooda iyo fikradooda u midayn lahaa. Maalmihii ugu horreeyey Kacaanka waxa la furay Xafiiskii Xiriirka dadweynaha (PRO).

Ujeeddada loo furay waxay ahayd :

1) In dadweynaha xiriir joogta ah lala yeesho, si loo fuliyo ra'yiga iyo ujeeddooyinka dadweynaha.
2) Inuu saldhig u noqdo ururrada ijtimaaciga ah ee lagama maarmaanka u ah Kacaanka Hantiwadaagga ah.

Ujeeddada weyn ee laga lahaa ururradaas ijtimaaciga ah waxay ahayd: In dhismaha dalka laga wada qayb galo, si loo gaaro horumar deg deg ah. Si loo gaaro ujeeddadaasna waxa waajib ahayd :

1) In la mideeyo fikradda dadka Soomaaliyeed.
2) In la kordhiyo garashada dadweynaha ee siyaasiga ah gaar ahaan in la kordhiyo garashada Hantiwadaagga.
3) In la mideeyo xoogga dadweynaha.

4) In awood loo siiyo dadweynaha in ay qayb ka qaataan maamulka siyaasadda iyo dhismaha dadka oo ay ka wada tashadaan danaha dalkooda iyo mustaqbalkooda.

5) In intii is qaadan kartaba oo isku shaqa ahba isu ururaan sida, ardayda, shaqaalaha, beeraleyda, hooyooyinka, dhallinyarada iwm.

Qaybahaas oo dhan waxa loo sameeyey ururro. Ururradaasi waxay kala yihiin:

1) Ururka Ubaxa Kacaanka Oktoobar (UKO).
2) Ururka Ardada Soomaaliyeed (Barbaarta Oktoobar).
3) Ururka Shaqaalaha Soomaaliyeed.
4) Ururka Hooyooyinka Soomaaliyeed.

I — UKO: Ururka Kacaanka Oktoobar wuxuu dhashy 18kii Juun 1971kii. Waxaa magacaas u bixiyey Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka taariikhda aan kor ku soo sheegnay markii uu booqashada ugu tegey arday yar yar oo ku jirtey Xarunta dhallinyarada ee Ceel jaalle, Ururka UKO waxaa geli kara ilmaha da'doodu u dhexeyso 7-14 sano, ee ku jira dugsiyada hoose iyo kuwa dhexe. Wuxuu ka sameeysan yahay dugsiyada dalka oo dhan.

Ujeeddada Ururka waxaa ka mid ah :

1) In ilmaha fursad loo siiyo inay is-arkaan, oo ku kulmaan dugsiga dibaddiisa.

2) In si fiican loo barbaariyo oo la siiyo tarbiyad waddani ah. Sidaasi waxaa weeye in la jeclaysiiyo ilmaha oo lagu xiro Calankooda, qaranimada ummaddooda, qawmiyadda Soomaaliyeed, Kacaanka Hantiwadaaga ah ee Soomaaliya, isla weeynida iyo isku kalsoonida, ayadoo la barayo sheekooyinka taariikhda, dhaqanka Soomaalida iyo wax alla wixii ilmaha ku abuuri kara geesinimo, kalsooni, waddan jacayl iyo isla weeyni ummadnimo.

3) In la baro dabeecadda joqoraafiga ah ee dalkooda oo awood loo siiyo inay soo arkaan meelaha buuraha leh, beeraha, wabiyada hawdka, iyo wax allaale wixii la xiriira dabeecadda dhulkooda quruxda leh (xilliga doogga ah).

4) In lagu ababiyo akhlaaq wanaagsan iyo dadnimo taabgal ah si ay u noqdaan dad wax tar leh.



Ururka UKO waa ugu badan yahay urarrada. Marka uu ardaygu gaaro sannadka shan iyo tobnaad, wuxuu xaq u leeyahay inuu galo oo ka mid noqdo Ururka Ardayda, (Barbaarta Oktoobar).

Shaqada Ururka waxaa ka mid ah:

b) Nadaafadda dugsiga.

t ) Nidaamka dugsiga.


j ) Riwaayadaha iyo aqoonta guud ee dugsiga.

x) Maamulka ururkooda iyo kaalmada dadka, ururinta taariikhda waxa ay ka helaan marka ay dibadda u baxaan.

kh) Waxay kaloo qayb ka qaataan hawlaha Iska Wax u Qabso, si ay ilmuhu ugu ababaan shaqo jeclida ay siddo fikradda Iska Wax U Qabso.

## II — Barbaarta Oktoobar : (Ururka ardayda).

Ururka Ardayda Soomaaliyeed waxaa la asaasay bishii May 1973kii, markaas oo la qabtay shirweyne ay isugu yimaadeen dhammaan wufuud ka socota dugsiyada dhexe iyo kuwa sare ee Gobolka Banaadir.



Ururku wuxuu sharci ahaan uga furan yahay dugsiyada dhexe iyo kuwa sare ee Jamhuuriyadda, waxaana ka qayb gali kara arday kasta oo da'diisu tahay 15-30 sano jir.

Ujeeddada Ururkaasi u dhismay waxay ahayd :

1) In la mideeyo xoogga dhallinyarada Soomaaliyeed.

2) In awood loo siiyo in ay qayb weyn ka qaataan maamulka iyo dhismaha dalka.

3) In Ururku uu noqdo dugsi ay ka bartaan siyaasadda. Aydiyolojiyadda, isxukunka, kala danbaynta, hog-

gaamin wanaagga iyo wixii la xiriira nidaamka ay u baahan tahay ilbaxnimada cusubi.

4) In ay qayb weyn ka qaataan xoojinta maamulka dugsiyada.


5) In ay ka shaqeeyaan horumarka iyo faafinta dhaqanka wanaagsan ee ummadda Soomaaliyeed.


6) In ay daafacaan oo sii cusboonaysiiyaan Kacaanka 21ka Oktoobar ee Hantiwadaagga ah.

7) Inay macallimiinta kala qaybgalaan kordhinta heerka aqoonta ayagoo samaynaya kooxo wax wada barata sida; kooxda taariikhda iyo joqoraafiga, sayniska, Afka, Kacaanka, xisaabta. iwm.

8) Inay wax ka qabtaan wax allaale wixii dadweynaha iyo dalka wanaag u soo jiidaya.

9) Inay u halgamaan midaynta dalalka iyo ummadda Soomaaliyeed.





Shaqada Ururku waxa weeye inay ka shaqeeyaan sidii ay u fulin lahaayeen ujeeddadooda iyagoo tixgelinaya dabeecadda meesha ay joogaan, (beeraley, xoola dhaqato, xeeb iwm.)


III — Ururka Shaqaalaha :

## XOOGSATO WAA DADKA MURUQOODA, IYO DHIDIDKOODA MAALA

Ururka shaqaaluhu waa kan ugu xoog weyn ururrada dalka jira. Wuxuu dhashay ayaamihii ugu horreeyey ee Kacaanku dhashay.

Ururka shaqaaluhu wuxuu ka unkamay, markii ugu horreesey, warshadaha gaarka loo lahaa oo aan dawladdu gacanta ku hayn.

Kadibna wuxuu wada gaaray dhammaan meel kasta oo dad shaqeeyaa ay jiraan dalka oo dhan.



Waxaa Ururka ku jira qof kasta oo shaqaale ah.

Ujeeddooyinka Ururka waxaa ka mid ah:

1) Daafacaadda iyo hirgelinta mabda' hantiwadaagga cilmiga ah.

2) Kordhinta wax soo saarka (production) dhaqaalaha.

3) In shaqaaluhu qayb weyn ka qaataan maamulka dhismaha dalka.

4) In ururku uu noqdo dugsi ay shaqaaluhu wax ka bartaan gaar ahaan mabda'a hantiwadgga cilmiga ah.

5) Mideynta xoogga shaqaalaha Soomaaliyeed.

6) Inay qayb ka qaataan dhaqdhaqaaqyada horuusocodka ah ee dunida.

7) Mideynta dalalka Soomaaliyeed.

8) Daryeelidda nolosha iyo xuquuqda shaqaalaha, xagga dhaqaalaha, xagga caafimaadka iwm.

Shaqaaluhu waa lafdhabarta Ummadda. Waa kuwa soo saara wax alla waxaan cuno, cabno, huwanno, ku hoyanno, isku daaweeyno. Sidaas darteed shaqaaluhu waa nafteenna, ma noolaan karayno la'aantooda.

Waxay mudan yihiin xormo iyo ammaan.

**IIV — Ururka Dumarka Soomaaliyeed:**

Dumarku waa beesha barkeed, haweenkuna waa shaqaale, macallin, askar, oo waa hooyo, waa nunugga qoyska. Dumarka Soomaaliyeed waxaa lagu yaqaan firfircooni, hawlkarnimo iyo wadaninimo. Kaalin weyn bay ka qaateen dagaalkii gobannimadoonka, haddana iyagaa ugu horreeya dagaalka loogu jiro dhismaha haniwadaagg ah.

Kacaankeennu wuxuu rumeysan yahay fikradda ah: Hoyadu waa dugsi; haddii si fiican loo barbaariyo, waxay barbaarisaa carrur fiican oo toosan, akhlaaq leh. Xukumadihii Kacaanka ka horreeyey waxay haweenka u arki jireen inay yihiin wax guriga iska jooga oo shaqada laga dhawro, maamulka dalkana aan ka qayb geli karin.

Kacaankuse wuxuu aaminsan yahay in ay haweenku yihiin bulshada barkeed. Haddii bulshada barkeed shaqada laga

xiro, bushadii bar baa curyaan **ah, oo aan waxba soo** saarin. T si waxay keenaysaa dibudhaca dhaqaalaha dalka. Hadda waa la wada shaqeeyaa. Sidaas darteed dhaqaalihii dalku wuu siyaaday.

Kacaanku isagoo arrintaas aaminsan ayuu ka shaqeeyey sidii ay haweenku u heli lahaayeen awood ay kaga qayb galaan dhismaha dalka, xaqoodana ku heli karaan, gaar ahaan xaqa ay u leeyihiin inay ka qayb qaataan maamulka siyaasadeed ee dalka.

Si arrintaas loo fuliyo, waxaa haweenka loo sameeyey xeer u oggolaanaya inay samaystaan urur (Ururka Haweenka). Hadda meel kasta oo Jamhuuriyadda ah waxaa ka dhisan guddiyo lagu magacaabo guddiyada haweenka, waxayna ku xiran yihiin Xafiiska Siyaasadda, **Laanta Haweenka.**
Ujeeddada weyn ee guddiyada waxaa ka mid ah:

1) In la kordhiyo aqoonta guud ee haweenka, gaar ahaan xagga siyaasadda.
2) In ay helaan awood ay kaga qayb galaan maamulka dalka.
3) In xooggooda iyo fikraddooda la mideeyo si ay uga qayb qaataan dhismaha dalka.
4) In la hagaajiyo lana kordhiyo aqoontooda xagga dhaqaalaha guriga iyo xannaanada carruurta.
5) In ay dunida kale xiriir la yeeshaan, si ay wax ugu faa'iideeyaan, uguna faa'iideystaan.

Waxaa kale oo jira ururrada dhallinyarada iyo Guulwayaasha. Ururka dhallinyarada waxa ku jira dhallinyarada dugsiyada dhigta iyo kuwo aan dhigan. Ardaygu isagoo ururka Ardada ku jira ayuu ka mid noqon karaa Ururka dhallinyarada.

Macnuhu waxaa weeye ardaygu laba magac ayuu qaadan karaa: magac arday iyo mid dhallinyaro, marna waa dhallinyaro, marna waa arday, dalkoo dhan waxaa ka dhisan guddiyo dhallinyaro.

Ujeeddada guddiyadaasi waxay la mid tahay tii ururka Ardayda.



Guulwadayaasha xaalkoodu waa ka duwan yahay. Guulwadayaashu iyagoo ah dhallinyaro, ayey haddana yihiin ciidan naftooda-hurayaal ah oo heegan u ah difaaca dalkooda iyo Kacaankooda. Waxay leeyihiin dishibliin la mid ah kan millateriga. Dhammaan ururradaas iyo guddiyadaasi waxay hoos yimaadaan Xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada G.S'K. Xafiiska siyaasaddu waa xuddunta weyn ee isku xirta dhammaan ururrada iyo guddiyada dalka ka dhisan, laakiin maamulka iyo gacan ku haynta ubaxa iyo Ururka Ardayda waxaa gacanta ku haya Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.

Waxaa jira dalkeenna Jamciyado kale waxaana ka mid ah :

1) Jamciyadda Bisha Cas oo shaqadeedu tahay inay u darbanaato shaqada Kaalmada degdegga ah (FIRST AID).
2) Jamciyaadka cayaaraha iyo xiriirrada cayaaraha (Sports Associations and Federations).

Xilka ugu weyn ee ururradaas iyo jamciyadahaas saaran ee ay ka wada siman yihiin, waxaa weeye hirgelinta mabda'a Hantiwadaagga ah, iyo daafacaadda miraha Kacaanka, si loo gaaro ujeeddada ummadda Soomaaliyeed taas oo ah xornimada iyo miynimada Soomaali weyn.

## Casharka Labaad

## URURKA MIDAWGA AFRIKA (UMA)

**Gogoldhig:**

Laga soo bilaabo qarnigii 15aad, gumeystayaashu waxay ku fikirayeen inay qabsadaan qaaradda Afrika. Markaas kaddibna waxaa dhexmaray iyaga iska horimaad. Dawlad waliba waxay doonaysey in ay ka qaadato qayb libaax gumeysiga Afrika. Sidaas darteed ayey shirkii Barliin 1884kii heshiis ku gaareen oo ay qaybsadeen qaarradda Afrika oo dhan, iyagoo ilaalinaaya danahooda keliya, oo aan dan ka lahayn danaha dadka reer Afrika.

Qaybintaasi waxay keentay in la kala googooyey dadkii afrikaanka ahaa ee isku midka ahaa oo loo sameeyay magacyo cusub.

Sidaas darteed, dadkii Afrikaanku kolkii ay baraarugeen oo ay billaabeen halganka, halgankaasi wuxuu ahaa mid dal kasta u gaar ah iyada oo uu cadaadiska gumeysigu ahaa mid ku saabsan qaarradda oo dhan. Sidaas darteed halgankoodu wuxuu ahaa mid aan mira badan keenin.

Laakiin, 1945 ayaa lagu guntay magaalada Maanshistar (Manchester) oo ah dalka Ingiriiska, shirkii shanaad ee Midawga Afrika (Pan-Afrikan) kaas oo lagu soo koobay ujeeddada halganka Afrikaanku inuu ahaado mid ku saabsan qarradda oo dhan. Markii la soo gaaray 1975kii halganka Afrikaanku wuxuu qaaday tallaabooyin waaweyn, waxaana ka mid ahaa kuwa soo socda :

**I — Shirkii Akra - 1958kii** bishii Abril 1958kii ayey siddeed dawladood oo madaxbanaanaa qaarradda Afrika oo dhan ku shireen magaalada Akra ee dalka Gaana. Ujeeddada shirkuna waxay ahayd :

1) In la helo habkii loo xoojin lahaa, loona ilaalin lahaa qaranimada dawladahaas.

2) In la baaro umuuraha muhimka ah ee ay dawldahaasi wadaagaan.

3) In la xoojiyo xiriirka dhaqaalaha iyo dhaqanka u dhexeya dawladahaas.

4) In la abuuro sidii loo kaalmeyn lahaa dadyawga Afrika ee u halgama xorriyadooda.

Shirkaasi aad ayuu muhim u ahaa, maxaa yeelay wuxuu ahaa kii ugu horreeyey ee lagu qabtay qaarradda Afrika.

**II — Shirkii Dadyawga Afrika ee Akara 1958kii :**

Bishii Diisambar 1958kii ayaa lagu qabtay shirkan magaalada Akra (Ghaana) waxaana ka soo qayb galay ergooyin ka kala socda 62 urur oo waddani ah, waxaana lagu baaray wax alla wixii la xiriira halganka qaaradda Afrika oo dhan

**III — Shirkii Saddexaad ee Dadyawga Afrika :**

Bishii Maarso 1961kii ayey dadyawga Afrika ku shireen magaalada Qaahira waxaana lagu baaray shirka waxa la yiraahdo «GUMEYSIGA CUSUB».

Markaas ka hor gumeystayaashu waxay arkeen khatarta uu u leeyahay iyaga halganka isku duuban ee Afrikaanku. Sidaas darteed waxay kala hortageen siyaasadda soo socota:

1) In ay cadaadis ka galiyaan dawladaha madaxbanaan xagga dhaqaalaha iyo siyaasadda.

2) In ay siiyaan dalal ay gumeystaan gobonimo magac keliya ah.

Gumeystayaashu way ku guulaysteen siyaasaddaas maxaa yeelay waxaa ka cadaatay shirkii Afrikaanka ee lagu qabtay Liibeeriya bishii juun 1959kii in ay Afrikaanku u kala qaybsanaayeen laba qaybood :

1) Qayb aragta in Afrikaanku midoobaan.

2) Qayb aragta inay dawlad waliba gaarkeeda ahaato oo ay dawladuhu xiriir uun yeeshaan.

**A — Ururkii Manroofiya :**

Bishii Maajo 1961kii ayaa waxaa ku shiray magaalada

Monoroofiya, dalka Liibeeriay, dawladaha Afrikaanka ah ee ku hadla Afka Ingiriiska.

**B — Ururkii Baraasafiil :**

Waxaa ku shiray magaalada Baraasafiil dawldaha Afrikaanka ah ee ku hadla afka faransiiska.

**T - Shirkii Laagoos:**

Bishii Jannaayo 1962kii ayaa waxaa ku shiray magaalada Laagoos 28 dawladood oo Afrikaan ah waxayna qaateen go'aanno aan horey u wadayn midaynta Afrika.

Haddii aan u fiirsanno shirarkaas faraha badan, waxaana arkeynaa in Afrika baahi weyn u qabtay urur mideeya; in ay gumeystayaashu ku guulaysteen siyaasaddoodii ahayd in ay firdhiyaan halganka Afrikaanka.

Laakiin guushii waxay u dambeysay dadkii horusocodka ahaa markii ay ku guulaysteen in ay isu ururiyaan dawladaha Afrika kaas oo ahaa markii la qabtay shirkii Midawga Afrika **1963kii.**

Ma jirto qaarad ka mid ah qaarradaha adduunka oo ay u saamaysay dhibaatada gumeystayaashu sida qaarradda Afrika. Dhibaatadaas oo ah dal iyo dad isku mid ahaa oo la kala googooyey, cadaadis iyo addoonsi aan raxmad lahayn iyo iibsasho dad nool (Slave Trade). Dadyawga Afrikana, qarniyaal badan ayey nolosha ku cadaabanaayeen. Waxaa la baday faqri, jahali iyo cudur. Haddaba, haddii ay dadyawga Afrika gaareen gobanimadoodii, run ahaan gobanimadaas kuma aynan gaarin dhib yaraan, ee waxay ku gaareen midnimo, halgan dheer iyo dagaal dhiig badani ku qulqulay. Hase yeeshee gumeysigii markii uu irrida ka baxay ayuu dariishada ka soo galay. Markaas ayey dadyawga Afrika si dhab ah u ogaadeen in aynan ilaalin karin mirihii halgankooda in ay is-urursadaan oo ay midoobaan mooyeene. Sidaas awgeed ayey madaxweynayaal ka kala socda kow iyo soddon dawladood oo Afrikaan ah oo markaas gobanimo haystey ku shireen magaalada Addis Ababa, waxayna soo saareen Ballanqaad ka kooban saddex iyo soddoon qodob 22kii bishi Maajo 1963kii, ballanqaadkaas

waxaa lagu dhaliyey URURKA MIDOWGA AFRIKA. Maadadiisa kowaadna waxay cadaynaysaa in uu ururku ka kooban yahay dawladaha Afrika ee gobannimada haysta.

## 1 — Ujeeddada Ururka Midawga Afrika:

Ujeeddada Ururka Midawga Afrika (UMA) sida lagu caddeeyey ballanqaadka waxaa weeye sida soo socota:

1) In la dhiirrigeliyo midnimada iyo isku dhuubaanta dawladaha Afrika.

2) In la xoojiyo iskaashiga iyo halganka ay ugu jiraan dawladaha Afrika sidii ay u gaarsiin lahaayeen dadyawga Afrika nolol wanaagsan.

3) In la difaaco qarannimada iyo nabadgaliyada dalalka Afrika oo dhan.

4) In al dhiirrigeliyo iskaashiga dawliga ah iyada oo la tixgelinaayo Ballanqaadaakii Ummadaha Midoowbay ee ku saabsanaa xuquuqda aadamiga.

5) In laga ciribtiro qaaradda Afrika gumeysiga oo dhan midabkasta ha lahaadee.

6) Si loo gaaro ujeeddooyinkaasna waa in ay dawladaha Ururka Midawga Afrika isku mid ka dhigaan siyaasadahooda, gaar ahaa wixii ku saabsan goobaha soo socda.

1) Iskaashiga siyaasiga ah iyo kan diblomaasiga ah.

2) Iskaashiga dhaqaalaha.

3) Iskaashiga xagga waxbarashada iyo aqoonta.

4) Iskaashiga xagga caafimaadka, dhakhtarnimada iyo cuntada.

5) Iskaashiga cilmiga iyo farsamada

6) Iskaashiga xagga nabadgelyada iyo difaaca.

## II — Mabaadi'da Ururka Midawga Afrika :

Mabaadi'da ururka midawga Afrika wuxuu ka kooban yahay qodobada soo socda :

1) Sinaanta iyo qarannimada dawladaha Ururka Midawga Afrika oo dhan.

2) In aan la faragelin umuuraha gudaha ee dawladaha Ururka Afrika.

3) In la xurmeeyo qarannimada iyo nabadgeliyada dalka dawlad kasta oo ka mid ah Ururka Midawga Afrika.

4) In lagu dhameeyo wax alla wixii dhibaato ah si nabadgeliyo ah, taas oo ah, hadal iswaydaarsi, dhexdhexaadis iwm.

5) In la cambaareeyo dilista siyaasiga ah midabkastaba ha lahaatee.

6) Waa in xoogga la saaro sidii lagu gaarsiin lahaa dalalka Afrika oo dhan gobonimo buuxda.

7) In la xoojiyo siyaasadda dhexdhexaadka ah ee adduunka.

## III — Golayaasha Ururka Midawga Afrika :

Ururka Midawga Afrika wuxuu ka kooban yahay golayaasha soo socda :

1) Galaha Madaxweynayaasha: golahani waxaa weeye guddida ugu sarreeya ururka, wuxuuna ka kooban yahay madaxweynayaasha dawladaha ku jira Ururka oo dhan, wuxuuna shiraa sannadkiiba mar.

2) Golaha Wasaaradda: golahani wuxuu ka kooban yahay wasiirrada Arrimaha dibedda wuxuuna shiraa ugu yaraan sannadkiiba laba goor.

3) Xoghaynta Guud: Xoghaynta Guud waxay ka kooban tahay xoghayaha guud iyo kaaliyayaashiisa iyo shaqaalaha xoghaynta guud.

4) Laanta dhexdhexaadiska iyo heshiisiinta.

## IV — Laamaha Ururka Midawga Afrika :

Ururka Midawga Afrika wuxuu ku fushadaa shaqadiisa

Laamo kala gedisan oo isaga ka tirsan waxaana ka mid ah:

1) Laanta dhaqaalaha iyo bulshada.

2) Laanta umuuraha caafimaadka, dawaynta iyo cuntada;

3) Laanta umuuraha waxbarashada iyo dhaqanka.

4) Laanta difaaca.

5) Laanta umuuraha guud, farsamada, baarista iyo cilmiga.

**V — Hawlaha uu wax ka qabtay Ururka Midawga Afrika:**

Hawlaha ugu waaweyn ee uu Ururka Midawga Afrika isku dayey inuu wax ka qabto, tan iyo waagii la asaasay waxay ahaayeen hawla uu gumeysigu kaga tagey qaarradda, kuwaas oo ah dhul dawladi leedahay oo uu dawlad kale siiyey sida dhulka Soomaaliyeed ee Keenya iyo Itoobiya uu siiyey, dhibaatada midabtakoorta, iyo dalal weli gumeysigu haysto sida dalka Soomaaliyeed ee ay Xabashidu haysato, Xeebta Soomaaliyeed ee uu Faransiisku haysto iyo dalalka Roodiisiyo, Koonfurta Afrika ee ay dad yar oo caddan ahi heystaan.

Gumeysigu wuxuu ugu abuuray hawlahaas qaarradda Afrika si uu uga soo jeediyo dadyawga Afrika hawlaha sugaya marka ay qaataan gobannimadooda, kuwaas oo ah; hawlaha dhaqaalaha, tacliinta, caafimaadka, iwm. Hadda waxaan si gaaban ugu sheekaynaynaa hawlahaa qaarkood ee uu Ururka Midawga Afrika isku dayey inuu wax ka qabto:

**I — Soomaaliya iyo Amxaarada :**

b) 1964kii Soomaaliya iyo Amxaarada waxaa dhexmaray dagaal markii ay Xabashidu soo gardaraysatay Soomaaliya. Ururka Midawga Afrika intuu dhexdhexaadiyey labada dawladood ayuu ku guulaystey xabbad joojinta dagaalkaas.

t) 1973kii shirkii tobnaad ee Midawga Afrika

waxaa la soo hor dhigay arrinta dalka Soomaaliyeed ee ay Xabashidu gumeysato, waxaana loo xil saaray guddi ka kooban siddeed dawladood oo soo baara dhibaatadaas.

j) Shirkii 11aad ee Midawga Afrika ee lagu qabtay Xamar, guddidii w a x a y soo hordhigtay shirka hawshii loo xil saaray, hase yeeshee shirku mar kale ayuu guddigii xilkii dib u saaray.

Haddii aan dib ugu fiirsanno dhibaatada dhulka Soomaaliyeed ee ay Xabashidu gumeysato waxaan arkeynaa in Ururka Midawga Afrika ku guulaysanin in uu wax ka qabto, sababtuna waxay tahay Xabashida oo aan inna gar oggolayn.

**II — Dagaalkii Algeeriya iyo Marooko:**

1964kii Aljeeriya iyo Marooko waxaa dhexmaray dagaal iyaga oo ku doodaya meesha la yiraahdo TINDDOF ee birta badan, markaas ayuu Ururka Midawga Afrika ku dhexdhexaadiyey labada dawladood shir lagu qabtay magaalada Baamaako xarunta dalka Maali, waxaana lagu gaaray shirkaas in xabbadda la joojiyo oo ay labada dawladood wada hadal yeeshaan.

**III — Midabtakoorka :**

Ururka Midawga Afrika si xoog leh ayuu uga soo horjeedaa siyaasadda midabtakoorka ah ee ay ku dhaqanto dawladda Koonfurta Afrika iyo fallaagada Roodiisiya, wuxuuna diiday in lala yeesho hadal iswaydaarsi ama xiriir xag kastaba ha ahaate.

Hadal iyo dhamaati, Ururka Midawga Afrika wuxuu ku talaabsaday, tan iyo waagii la asaasay, wax alla wixii suura gelinaya in la ciribtiro midabtakoorta.

**IV — Dhaqdhaqaaqyada Gobonimodonka ah :**

Ururka Midawga Afrika wuxuu ku talaabsaday tan iyo waagii la asaasay sidii loo xorayn lahaa dalalka Afrika ee la

gumeysto, gaar ahaan kuwa uu Burtuqiisku gumeysto. Sidaas darteed, waxay ku kaalmeynaayeen dadka u halgama dalalkaas wax kasta, gaar ahaan xagga dhaqaalaha, waxbaarista, hubka iyo hawlaha dalalkaas oo la hordhigo shirarka adduunka, laguna canbaareeyo dawladaha gumeysta dalalkaas. Ururka Midowga Afrika wuu ku guuleystey arrimahaas, taasina waxay keentay in ay dalal la gumeysan jirey waagii la aasaasay Ururka gobanima qaateen, kuwo kalena ay beri dhaw qaadan doonaan.

## V — Faa'iidooyinka Ururka Afrika :

Qaarradda Afrika faa'iidooyin badan bay ka heeshay «UMA», guulo badanna wuu soo hoyiyey.

Faa'iidooyinkaasi waxay ka muuqdaan meelo badan oo ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

### I — Xagga Dhaqaalaha

Ururku qayb weyn ayuu ka qaatay horumarka dhaqaalaha Afrika, gaar ahaan xagga meelaha soo socda:

b) Wuxuu sameeyey Bangi; Bangiga horumarinta Afrika, ee saldhigiisu yahay magaalada Abidjaan caasimadda Ayfiri Kosti.
Ujeeddada loo sameeyey Bangigaas waxaa weeye inuu ka qaybgalo mashaariicda horumarinta Afrika, gaar ahaan waxa lagu magcaabo «infarstructure», sida waddooyinka, garoomada, dekadaha iwm. isagoo lacag amaahinaya dawladaha ku jira Ururka.

t) Wuxuu geesinimo geliyaa xiriirka ganacsiga ee dawladaha Afrika.

j) Wuxuu ku dadaalaa sidii wax looga qaban lahaa gaadiidka iyo isgaarsiinta dalalka Afrika.

### II — Xagga Waxbarashada, Cilmiga iyo Dhaqanka :

Afrika waxay iska kaashataa goobaha waxbarashada, cilmiga iyo dhaqanka. Dawladaha Afrika waxay isweydaarsadaan ardayda wax barata (Scholarship), kooxaha fanka iyo

cayaaraha, waaya-aragnimada cilmiga, waxaana la sameeyey laan u qaybsan Baarista Cilmiga.

**III — Xagga Difaaca :**


Afrika waxay samaysatay xiriir difaac ah oo lagu magcaabo Guddiga Millatariga Afrika.


Haddii dal Afrika ah dibadda lagaga soo duulo, dawladaha Afrika waxaa waajib ku ah inay garab istaagaan dawladdaa lagu soo duuley.

**IV — Xagga Siyaasadda :**

Dawladaha Afrika waxay leeyihiin iskaashi siyaasadeed oo xoog leh. Arrimaha gaar ahaan Afrika la soo gudboonaada, guud ahaanna dunida la soo gudboonaada, Afrika meel keliya ayey ka istaagtaa, cod qurana waa ku wada hadashaa.

**V — Kaalinta ay Soomaaliya kaga jirto Ururka Midawga Afrika:**





Jamhuuriyadda Soomaaliya waxay ka mid ahayd dawladhihii ka soo qayb galay asaaski Ururka Midawga Afrika, qayb weyna waa ka soo qaadatay shaqooyinkii kala gedisnaa ee uu Ururka soo qabtay. Laakiin, kaalinta weyn ee ay kaga jirto Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya Ururka waxay aad u cadaatay intii ka dambeysay dhalashadii kacaankii barakaysanaa ee 21kii Oktoobar 1969kii, markaas oo ay xukuumadda Kacaanka ahi ka muujisay kacaannimadeeda ururka gaar ahaan wixii ku saabsan isu soo dhawaynta dawladaha Afrika, ciribtirista midabtakorta, xoraynta dalalka Afrika ee la gumaysto, iyo sidii ay dawladaha Afrika u ahaan lahaayeen dhexedhexaad xagga siyaasadda oo aynan midna u hiliilin labada kooxood ee iska soo horjeeda: Bari iyo Galbeed. Laakiin waa in ay xaqa u hiiliyaan, goor iyo ayaan si ay qayb uga qaataan nabadda aduunka. Waxaa kale oo ay Soomaaliya ku guuleysatey intii Kacaanka ka dambeysay dawladaha A-Afrika in ay Sahyuuniyaddu iyo madabtakoorku isku mid yihiin, taas oo keentay in Israa'iil laga cayriyo Afrika. Kaalinta weyn ee ay kaga jirto Soomaaliya Ururka waxay keentay in lagu qabtay shirkii Afrika ee 11aad magaalada Xamar.

Shirkani wuu ka duwana shirarkii hore, maxaa yeelay waxaa lagu baaray wax alla wixii dhibaata ah ee la gudboon Ururka gaar ahaan ciribtirista gumeysiga, midabtakoorka, xiriirka Ururka Afrika iyo Ururka Jaamicadda Carabta; iyo in la fuliyo go'aannada ka soo baxa «UMA». Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, iyada oo uu madaxweynaheedu ka madax ahaa Ururka midawga Afrika sannadkii 1974ka, waxay ku dadaashay sidii ay madaxweynayaasha dawladaha Afrika iyo madaxweynayaashaa dawladaha Carabtu shir isugu iman lahaayeen.

**Weyddiin :**

1) Goormuu gumeysigu bilaabay in uu soo galo qaarrada Afrika ?

2) Shirkii koowaad ee Akra aad ayuu muhim u ahaa, maxaa ugu wacnaa?

3) Intii ka horreysey 1963kii dawladaha Afrika waxay u qaybsanaayeen kooxo, ka sheekee kooxahaas iyo u jeeddooyinkoodii.

— 33 —

4) Goormaa, xagee baase, imisa dawladood baase ka qayb gashay asaaska Ururka Midawga Afrika?

5) Sheeg shan qodob oo ka mid ah ujeeddada Ururka Midawga Afrika.

6) Ururka Afrika waxba ka ma uusan qaban dhulka Soomaaliya ay Xabashidu gumeysato, maxaa ugu wacan?

7) Sheeg golayaasha iyo laamaha Ururka Midawga Afrika.

8) Sheeg hawlaha ugu waaweyn ee Afrika, maxuuse ururka ka soo qabtay?

9) Maxay tahay faa'iidada ay ka heleen dadyawga Afrika ururka?

10) Si tifaftiran uga sheekee kaalinta ay kaga jirto Soomaaliya ururka intii ka dambaysay 1969kii.

## Casharka Seddexaad

# HEERARKII TAARIIKHDA BULSHADA AADAMIGA

Bani aadamku wuxuu soo maray heerar kala geddisan, oo uu soo karayey. Ilaa iyo intii uu jirey aadamigu wuxuu soo kaydsaday aqoon iyo waaya aragnimo, ilaa uu soo gaaray heerka uu maanta joogo.

Dabeecadda uu la dagaalamay si uu u hagaajiyo nolo-shiisa, waxay u keentay dhibaatooyin badan, oo had iyo jeer ku khaybaysey inuu daawo u raadiyo.

La dagaalanka dabeecaddu weligii wuu soconayey wuuna socondoonaa ilaa iyo inta uu jiro qof nool, ama nafley ah uu joogo dunida dusheeda.

Dhinaca dhaqaalaha marka aannu ka eegno gaar ahaan shaqada, wax soo saaridda iyo qeybsashada waxaan arkaynaa in heer kastaba xilli u gooni ah lagu dhaqmi jirey. Habkii ugu horreeyey, is-addoonsi, dhulgoosi, hantigoosi ila laga yimaado nidaamka hantiwadaagga oo isagu ka xoreeyey bani aadamka nidaamyadii isku dul noolaadka ku dhisnaa, ee dabaqooyinka kala sareeya isboobaayeen. Hantiwadaaggu wuxuu la yimid hab ku dhisan sinnaan, caddaalad iyo xuquuqda uu baniaadamku ku leeyahay nolosha, oo la kafaalo qaado mustaqbilkiisa.

Shanta xilli ee ay bulshada aadamiga ahi soo martay waxay kala yihiin sida soo socda :

1) Xilligii Bilowga ahaa;
2) » Is-adoonsiga
3) » Dhulgoosiga.
4) » Hantigoosiga.
5) Xilligan Hantiwadaagga ah.

### I — Xiligii Bilowga ahaa:

Nolosha qofka aadamiga ahi waxay ahayd mid bilow ah oo dhib yar, waxay dadku ku noolaan jireen waxa ay dabeecaddu siiso, miraha, xabagta, quwaaxa iyo wixii la mid ah.

Qalabka ay wax ku soo saaran jireenna wuxuu ahaa mid aad iyo aad u hooseeya.


Xilligaas dadku hanti gaar ah ma lahayn. Miraha ayey geedaha ka wada guran jireen, wayna ugaarsan jireen, markay noloshii adkaatay koox koox baa laysu raaci jirey. Tacabkaas oo dhanna isku meel ayaa la isugu keeni jirey, kaddibna waa la wada qaybsan jirey, qalabka wax lagu soo saaro aad buu u liitay, wuxuuna ahaa mid aad u yar.




Maalintii shaqadaas iyagoo koox wada socda ah ayey u bixi jireen, habeenkii waxay wada seexan jireen godadka ama inkastoo dabeecaddu ay ku adkayd. Dabaysha, duufaanta loshiisa horukac.

Garaadka qofka oo yaraa darteed. wax walba waa ay dhibayeen, hase yeeshee wuxuu u hanqal taagayey qofku inuu gaaro nolol iyo dhaqan ka fiican kii hore.







**Xilligaasi wuxuu caan ku ahaa :**

1) Hanti gaar la'aan

2) Qalabka wax lagu tabco ama wax lagu soo saaro oo aan jirin ama liitay.

3) Tabac ama kayd la'aan.

4) Muran, isdiid iyo iska horimaad la'aan.

5) Wax isla cun, isla shaqeyn.

6) Nolol basiid ah, oo nabadgeliyo.

7) Garaad aad cayriin u ah.

II — Xilligii addoonsiga ahaa:

Bulshada aadamiga ahi waxaad moodda inay ka ilbaxsan tahay waqtigii kan horreeyey. Taas oo ah qofku inuu mar walba ku dadaalayey sidii uu u habayn lahaa noloshiisa.

Garaadka qofka wuu fiday, wuxuuna yeeshay lexejeclo, markaas ayaa waxaa bilaabmay fikrad ku dhisan lahaanshaha gaarka ah. Waxay bulshadii u qabsantay mudanayaal wax leh, qalabkii wax lagu soo saarayeyna haysta, iyo addoommo aan waxba lahayn, laakiin tacabka soo saarayey.

Habkii wax loo soo saarayey waa isbeddelay, laakiin qalabkii wax lagu soo saarayey wax weyni iskama beddelin. Koox yar oo mudanayaal ah ayaa waxay ku shaqaysan jireen dad badan oo addoommo ah. Is-addoonsiga waxaa keenay markii dadkii ay soo bateen, in loo kala qaybsamay qabiil-qabiil kaddibna dagaallo ayaa dhex maray. Waxaa dhacday in qabiilkii laga adkaado dadkiisa la addoonsan jirey, laguna shaqaysan jirey.

Addoontuna waxay ahaayeen wax la iska leeyahay sida qalabka oo kale oo haddii la dilo ama la cadaadiyo aan la isu sheeganayn, wax xaquuq ah oo ay leeyihiinna ma jirin, halkaas ayey billaabatay dabaqadihii ugu horreeyey.

**Xilligaasi wuxuu caan ku ahaa :**

1) Hanti gaar ah, iyo keli cun.
2) Duullaamo qolaba qolo ku duusho
3) Reero unkamay iyo qabiillo is-addoonsaday.
4) Dabaqaad unkamay iyo loollan ama muran bulshada ka dhex dhashay.
5) Garaadkii qofka oo kordhay.

**III — Xilligii Dhulgoosiga ahaa:**

Qofka aadamiga ahi wuxuu gaaray horukac ka wanaagsan xilliyadii kan ka horreeyey. Mudanayaashii wax addoonsaneyey waxay ku dhaqaaqeen inay dhulka beeraan, addoontuna uga shaqeyso.

Qofkii awood shaqaalo leh wuxuu qoqobtay dhul ballaaran oo uu qaarna dhisay qaarna beertay. Wuxuuna ku shaqeystay dad badan oo uu qaarna leeyahay, qaarna uu mushqaayad yar siiyo.

Dadkaas lagu shaqeystaa waxba kuma aynan lahayn beeraha iyo guryaha midna. Kooxda mudanyaasha ahi iyagoo gacanta ku hayey xukunka dawladda iyo xeerarka shaqadu ku socoto, sababta oo ah xoolihii bay gacanta ku hayeen, qofka xoolaha haya ayaa xukunka hayn jirey. Xeerarka shaqadu ku socoto waxay ahaayeen kuwo shaqaalaha dhiigooda lagu miiranaya, mudanayaashana lagu nooleynayo.

Saacada badan ayaa shaqadu socotaa, shaqaalahana waxba uma kordhaan. Dhinaca garaadka qofka iyo aqoontiisa iyo qalabka wax lagu soo saaro aad ayuu uga sarreeyey kii bulshada is-addoonsiga.

**Xilligii Dhulgoosiga wuxuu caan ku ahaa:**

1) Dhul kala qoqobasho.
2) Magan gelin.
3) Iskudulnoolaad.

4) Baad la siiyo dhulgoosatada, oo ay khasab tahay in mar walba wax loo keeno.

5) Muran iyo is hardi dabaqadeed oo xoogeystey.

6) Dawlad abuurantay iyo xeer la sameeyey.

7) Dhaqdhaqaaqyo horusocod ah ayey addoontii bilowday.

8) Garashadii siyaasadda ayaa soo bannaan baxday, taasuna waxay ka dhalatay aqoonta qofka oo korortay.

## IV — Xilligii Hantigoosiga ahaa:

Halgankii dabaqadaha kale sarreeya aad ayey u xoogeysteen, waxaana loo kala baxay saddex dabaqadood: dabaqad sare, dabaqad dhexe iyo dabaqad hoose.

Xukunka waxaa gacanta ku hayey dabaqadda sare, tan dhexe waa la tixgelinayey oo waxaa loo dhiibay shaqada dawladda jagooyinkeeda sare, dabaqada hoosena ayada ayaa ugu liidatay oo aan waxba loo oggoleyn, dadka shaqeeya ama aan shaqaynba ayada ayey u badnaayeen.

Habka hantigoosadka ah koox yar oo maalqabeen ah ayaa ku shaqeysta dadka intooda badan. Dadkaasna wax yar oo lacag ah oo aan ku fileyn, una dhigmin waxa ay soo saaraan ayaa mushaar ahaan loo siiyaa. Khayraadka ay shaqaaluhu soo saaraan intiisa badan in yar oo maalqabeen ah ayaa ku danaysata.

Shaqaalahana waxay ugu tala galeen inay mar walba cariiri ku jiraan.

Garaadka qofku wuu kordhay, wuxuuna gaaray in sancada horumarkeeda lagu dadaalo, halkaasna waxaa ka dhashay warshado kala duwan oo cayn kastaba leh, wax walbana sameeya.

Habka Hantigoosadka ah waxaa ka muuqda qorshayn la'aan dhinaca dhaqaalaha, waxbarashada, kaydka iwm. Si-

daas daraadeed ayaa qalalaasa badani uga dhacaan lacagta iyo baayacmushtariga suuqa.

Maalqabeenku wuxuu ku dadaalaa inuu dagaallo ka dhaliyo dadka dhexdooda ama dawladaha, si uu dantiisa ku gaaro. Labadii dagaal ee waaweynaa ee dunida ka dhacay, waxay ahaayeen mirihii habka hantigoosadka ahi uu keenay. Waxaa kale oo uu keenay dhul ballaarsi, taas oo ah dawladaha xoogga lehi inay gumeystaan dad iyo dalal aynan lahayn, waxaa kale oo uu keenay midabtakoorka uu dadka ku kala sooco.

**Xilligaasi wuxuu caan ku yahay:**

1) Loollan dabaqadaha u dhexeeya oo buux dhaafay.
2) Iskudulnoolaad iyo dhaqdhaqaaq shaqaale.
3) Dalal la qoqobto iyo Gumeysi.
4) Tartan suuqyada dunida kale loo tartamo, dagaallo waaweyn, gumeysi cusub oo bilowday xilligan (imbiryaaliyadda).
5) Xasil la'aan iyo jahawareer xagga dhaqaalaha iyo siyaasaddaba.
6) Baaris ku saabsan adduunweynaha, iyadoo wax laga qoray dhaqaalaha, siyaasadda, dabeecadda iyo falsafadda.
7) Cadaalad la'aan iyo kala sarayn.

## V — Xilligan Hantiwadaagga ah:

Ceebihii iyo dhibaatooyinkii aan ku soo sheegnay habka hantigoosadka ah, waxay ahaayeen waxyaale ay dhib leedahay inay xaaladdaasu sii socoto. Habka hantiwadaagga ahi wuxuu ka hor imaanayaa habkii ka horreeyey ee hantigoosadka ahaa, isagoo tirtiraya dhibaatooyinkiisii. Hantiwadaaggu waa hab ku dadaalaya inay bulshadu gaarto nolol wanaagsan, hantidii gaarka ahayd ee habkii hore waxaa beddelaya hanti dadweynuhu wada leeyahay.

Dhaqaalihii kala sarreeyey iyo iskudulnoolaantii waxaa baddelaya sinnaan iyo cadaalad, iyadoo la daryeelayo danaha dadweynaha.

Qofka waxaa lagu abaalmarinayaa shaqada uu qabto intay le'eg tahay, iyadoo la tixgelinaayo kartidiisa, aqoontiisa, iyadoo la tixgelinaayo kartidiisa, aqoontiisa, iyo dadaalkiisa. Qalabka wax lagu soo saaro waxaa iska leh dawladda oo masalaysa dadweynaha, qaybinta suuqa iyo sicirka waxaa loo ilaalinayaa si ay u fuliyaan danaha dadweynaha.

Qorsheynta dhaqaalaha, waxbarashada, caafimaadka iwm. Waxa lagu dhisaa si loo gaaro waxyaalaha ay dalka iyo dadweynuhu u baahan yihiin.

Wax kasta oo la soo saaro waxaa maamulkeeda iska leh dadweynaha shaqeeya, xukunka siyaasadda waxa gacanta ku haya dadweynaha oo ku maamulaya mabaadi'da hantiwadaagga cilmiga ku dhisan. Hantiwadaaggu wuxuu keenayaa horumar deg deg ah oo beesha waxtar u leh, waxaa kale oo uu tirtirayaa dabaqaadkii habkii hore, wuxuuna ku beddelayaa bulsho, xor ah oo dagaal iyo qaylo midna aan lahayn.

**Hantiwadaaggu wuxuu caan ku yahay :**

1) Qalabka wax lagu soo saaro oo la wada leeyahay.

2) Sinnaan, cadaalad iyo in la wada maamulo waxa la soo saarayo.

3) Xoogsatada horusocodka ah oo xukunka siyaasiga ah la wareegta.

4) Koox horusocod ah ama xisbi horusocod ah oo hoggaaminaya dalka iyo mabaadi'diisa.

5) Qorsheyn dhaqaale oo horumar degdeg ah lagu gaaro.

6) Hantidii gaarka ahayd oo lagu beddelo hanti dadweynuhu wada leeyahay.

Shantaas xilli ee ay soo martay bulshada bani aadamku, waxay na tusaysaa in xilliba uu ka horukacsanaa kii ka hore-

eyey, horkacaasuna weligii waa uu socdaa, qofkuna mar walba wuxuu ku dadaalayaa inuu noloshiisa gaarsiiyo heer ka wanaagsan midka uu haysto. Isbeddelka bulshada waxaa dhalinaya loollanka ka dhex taagan dabaqadaha beeshu ka kooban tahay.

Dabaqadahaas oo ay ugu muhimsan tahay dabaqadda shaqaaluhu.

Shaqaaluhu mar walba waxay ku dadaalaan inay ka baxaan ciriiriga xagga dhaqaalaha, waxbarashada, caafimaadka iwm.

Siyaala badan ayaa shaqaaluhu uga qiiroodaa dhibaatooyinka haysta. Marar badan waxay ka fariistaan shaqada, mararna waxay sameeyaan bannaanbaxyo laxaad leh, si ay ku muujiyaan gardarrada iyo xumaanta uu habka hantigoosiga ahi ku hayo.

Xilli kasta markii laga gudbayo, oo loo gudbayo xilliga ku soo xiga waxaa xumaada xiriirka u dhexeeya dadka wax soo saara iyo qalabka wax lagu soo saaro oo ah hanti gaar ah. Waxaa kaloo xumaada xiriirka u dhexeeya xoogga wax soo saara (shaqaalaha) iyo dadka loo shaqeeyo oo ah maalqabeenka leh qalabka wax lagu soo saaro. Iskahorimaadkaas iyo xiriirka xumaanaya waxaa sabab u ah HANTIDA GAARKA AH, oo koox ama qof keligi gooni u leeyahay qalabka lagu shaqeeyo sida meshiinnada, matoorada, guryaha iwm.

Haddaan soo ururinno hadalka, waxaan ku soo xiraynaa in habka hantiwadaagga ahi uu ugu fiican yahay, uguna horukacsan yahay hababka oo dhan. Sidaas daraadeed ayaa kacaankeennu u doortay Hantiwadaagga.

Dawlad waliba waxay ku dhaqan gelinaysaa Hantiwadagga iyadoo tixgelinaysa heerka dhaqaalaha iyo dhaqanka ay leedahay iyo waxyaalaha gaarka u ah dalkaas, oo ay ugu muhimsan yihiin waxyaalaha saldhigga u ah qawmiyadda ummadda dalkaas.

Casharka afraad

# HANTIWADAAGGA CILMIGA SIDEE U HIRGALINAYNAA ?

## TILMAANTA GUUD EE HANTIWADAAGGA IYO HANTIGOOSADKA

«Mabda'a hantiwadaagga cilmiga ahi waa jidka keliya ee aynu kaga bixi karno dhibaatada, kuna dhisi karno dalkeenna, isku afgaran karro, isku raaci karro oo aynu ku sinmi karro».

«Hadal yar, Hawl badan iyo Hanuunsanaan ayaa dhakhso lagu hormarayaa». (Jaalle Siyaad).

Hantiwadaagga Cilmiga ahi waa nidaam caalami ah oo cilmi ah, wuxuu fasiraa dabeecadda beesha (bulshada), dhaqaalaha, siyaasadda, dunida ama dabeecadda inagu meersan iyo wax kasta oo la xiriira nolosha dadka. Markuu Hantiwadaaggu waxyaalahaas fasirayo, wuxuu ka eegaa oo uu ku fasirayaa si bani aadamka faa'iida u leh ama uu kaga faa'iidaysan karo, si dadkoo dhami barwaaqo ku gaaraan oo ay u sinnaadaan.

Hantiwadaaggu waa fikrad ka jawaabaysa, su'aal kasta, daawana u raadinaysa dhib kasta. Sidaas darteed waa nidaamka ugu fiican ee uu dadku ku gaari karo horumar, barwaaqo, sinnaan, caddaalad iyo nabadgaliyo. Hantiwadaaggu waa nidaam caalami ah, dalal badan oo dunida ah ayaa ku dhaqma. Dunida ka barkeed waxay ku dhaqantaa Hantiwadaag, barka haraynа weli wuxuu u dagaalamayaa inuu gaaro oo uu ku dhaqmo nidaamka Hantiwadaagga. Hantiwadaaggu ma kala qaybsana. Dunida laba nidaam oo keliya ayaa jirta; hantiwadaagga cilmiga iyo hantigoosadka.

Dunidoo dhan hal nidaam oo hantiwadaagga ah ayaa jira. Kaasi waa kan Cilmiga ah (Hawl iyo Hantiwadaag) waana kaan kor ku tilmaannay.

Nidaamka kalena waa Hantigoosadka. Hantigoosadku waa nidaamka ku dhisan, ee oggol gumeysi, kala sarrayn iwm. Wuxuu ku dhisan yahay Hantigoosadku oo uu oggol yahay in

lays addoonsado, oo dadku ku kala sarreeyaan xagga dhaqaalaha, dhalashada, midabka, aqoonta, iyo nolosha gu-ud ahaanba. Mabda'a Hantigoosadku wuxuu qabaa in waxyaalahaas oo dhan ay u gooni ahaadaan dabaqad yar (koox yar) oo iyadu aan shaqayn, laakiin leh oo ku raaxaysata waxa dadweynaha kale (shaqaalaha) ay soo saaraan.

Dadweynuhuna wuxuu soo saaray uu ka qatanaado, ama wixiisii laga gooyo. Sidaas darteed, Hantigoosadku waa **dulmi.**

**Sidee u Hirgalinaynaa Hantiwaadaagga ?**

In kastoo hantiwadaaggu uu mid keliya yahay, haddana sida loo hirgeliyaa waa kala duwan tahay. Dal walba sida ugu sahlan ayuu u dhaqangelinayaa isagoo fiirinayaa dabeecadda, dhaqanka, caadooyinka, dhaqaalah iyo heerka aqoonta dalkaasi ay joogto markaas. In waxyaalaha oo dhan la tixgeliyo waa xeer ka mid ah xeerarka mabda'a Hantiwadaagga.

Markii aan goosannay inaan Hantiwadaagga dalkeenna ku dhisno, waxaan ku dhaqaaqnay hirgelintiisa, waxaana qaadnay tallaabooyinka soo socda:
waxaan la wareegnay:

1) Dhammaan bangiyadii shisheeyuhu maamuli jirey.

2) Dhammaan shirkadihii Batroolka iyo dawooyinka.

3) Dhammaan dugsiyadii shisheeyuhu maamuli jirey.

**II — Waxa laga shaqeeyey in dadku isugu tagaan iskaashatooyin waxaana la abuuray iskaashatooyinka:**

1) Beeraha.

2) Hargaha iyo saamaha.

3) Farmashiyaalka.
4) Dharka (alindi).
5) Sanaacadda yaryarka ah sida birta.
6) Mallayga iyo kuwo kale oo badan.

**III. — Waxaa la sameeyey wakaalado madax bannaan oo ay ka mid yihiin:**

1) Wakaaladda Ganacsiga Guhada.
2) Wakaaladda Muuska.
3) Wakaaladda Horumarinta Sancada Mallayga.
4) Wakaaladda Batroolka Ummadda.
5) Wakaaladda Dhismaha.
6) Wakaaladda Daawooyinka.
7) Wakaaladda Alaabta Dhismaha.
8) Wakaaladda Madbacadda Qaranka.
9) Wakaaladda Xoogga Korontada.
10) Wakaaladda Biyaha.
11) Wakaaladda Taraqa iyo Sigaarka.
12) Wakaaladda Horumarinta Beeraha.
13) Wakaalladda Duxusha.
14) Wakaaladda Dekadaha.
15) Wakaaladda Dayuuradaha iyo kuwo kale oo badan.

**IV — Waxaa la sii hagaajiyey ama la dhisay warshada badan. Warshadaha dalkeenna waxaa ka mid ah:**

1) Warshadaha Hilibka ee Xamar iyo tan Kismaayo.
2) Warshadaha Mallayga ee Caluula, Qandala, iyo Las Qoray.
3) Warshadda Saabuunta.
4) Warshadda Sigaarka iyo Taraqa.
5) Warshadda Khudradda (ITOP).
6) Warshadda Xaashiyaha iyo Kartoonka (INCAS).
7) Warshadda Dharka ee Balcad.
8) Warshadda Sonkorta iyo Sanaacada Kabaha Cagga ah, Cadirka iyo Aalkolada ee Jawhar.
9) Warshadda Saamaha iyo Kabaha.
10) Warshadda Caanaha iyo warshadda kale oo yaryar ah oo badan.

**VI — Wxaa la qoday ceelal, waro iyo kaliyo badan. Waxana lala dagaalamay ama la dabargooyey cuduradii xoolaha iyo dadka. Waxaa kaloo la sameeyey jidad aad u fara badan. Waxaas oo dhan waxa loola jeedey in la hormariyo xannaanada xoolaha iyo guud ahaan nolosha dadweynaha.**

**VII — Waxbarashada :**

Qof kastoo Soomaali ah waxa laga ballanqaaday tacliin. Waxbarashadii waxaa laga dhigay khasab, waxaana wax lagu bartaa Afka Hooyo.

**VIII — Iskaashi Dadweyne iyo Xukumadeed :**

Iyadoo xukuumo iyo shacabba lays kaashanayo oo aan waxba la kala lahayn ayaa waxaa la dhisay dugsiyadii iyo isbitaalladii dadweynuhu u baahnaayeen si waxbarashada iyo caafimaadka loo daryeelo.

Sababta loo qaaday tallaabooyinkaas oo dhan waxay ahayd in la badiyo waxa la soo saaro si islamarkaasba dalka loogu celiyo lacagta ka timaadda oo lagu dhiso mashaariic kale oo cusub, in dhaqaalaha dalka la kordhiyo, dadkuna ay shaqo helaan (waxaa ila hadda shaqo heshay in ka badan 60,000 qof). Waxa sidaas loola jeeday in la gaaro oo lagu noolaado mujtamac hantiwadaag ah.

Tillaabooyinkaas in la qaado waxay ahayd waajib lama huraan ah, waana shardi ka mid ah shuruudda hirgelinta Hantiwadaagga Cilmiga waqtiga u gudbidda Hantiwadaagga. Innagu hadda weli ma aynaan gaarin hantiwadaag ee waa u soconaa.

Waxaan gaarayna markii aan aad u shaqayno oo aan isku fillaano, hantida iyo barwaaqada dalkana aan wada lahaanno, oo ay na deeqdo.

Sideebaan murtida Hantiwadaagga wax ugula soo bixi karnaa ? Waxaan murtida Hantiwadaagga wax kula soo bixi karnaa innagoo qaadna jidka Iskaa Wax U Qabso.

**Weyddiin :**

1) Sheeg xilliyada kala duwan ee uu soo maray bani-aadamka ?

2) Sidee bay ahayd nolosha qofka Aadamigu xillikii bilowga ?

3) Qalabka wax lagu soo saaro siduu ahaa? Tacabkana sidee loo qaybsan jirey ?

4) Muxuu caan ku ahaa xilligaasi ?

5) Maxaa lagu magcaabi jirey xilligii ku xigey ?

6) Yaa gacanta ku hayey qalabka wax lagu soo saaro?

7) Goormuu bilawday is-addoonsigu ?

8) Xilligii is-addoonsigu muxuu caan ku ahaa?

9) Xilligaas immisa dabqadood ayuu u qaybsanaa bani-aadamku ?

10) Sidee bay lahaanshadu ahayd ?

11) Maxaa keenay labadii dagaal ee waaweynaa ee dunida ?

12) Muxuu tirtirayaa habka hantiwadaaggu ?

13) Maxaa looga baahan yahay qorsheyn ?

Casharka Shanaad


## ISKAA WAX U QABSO

### Waa inaad ku faantid dhaqankaaga, taariikhdaada, afkaaga iyo suugaantaada

Fasalka Afraad waxaan ku soo qaadannay **Macnaha guud** ee «Iskaa Wax U Qabso». Waxaan ku tilmaannay inay tahay: **Isku kalsooni, Isku tashi** iyo **Is-aqoonsi ummadnimo.** Sannadkan waxaa inoo dhigan inaan qaadanno (garanno). Maxaa loola jeedaa «Iska Wax U Qabso» waa is-aqoonsi ummadnimo.

«Dadkii Gabayga iyo Dalkii Udugga»

Ummaddeenna Soomaaliya waxay leedahay taariikh dheer. Waxay soo jirtey kumanyaal sano. Taariikhdeennu waxay la fil tahay taariikhda dalalka Ilbaxnimadu ku soo horreysey sida: Masar Giriig, Shiina iyo Hindiya. Magaalooyinkeenna qaarkood, sida Muqdisho, waxay dhisnaayeen in ka badan kow iyo toban (11) Qarni (1100 sano). Waagaas Yurub inteeda badan, Ilbaxnimadu ma gaarin. Kumanyaalkaas sano oo ay Soomaaliya taariikhdeedu soo jirtey waxaa soo abuurmay oo soo kaydsamay taariikh aan ku faani karno,



dhaqan hodan ah, iyo suugaan (Gabay, Hees, Sheeko, Maahmaah, iwm.) qaali ah oo ay ka buuxdo xigmad iyo aragti dheer. Eebbe wuxuu hibo noo siiyey «suugaan» tanaad ah. Soomaaliya waxaa loo yiqiin «Dadkii gabayga». Dhulkeedana waxaa loo yiqiin «Dhulkii Udugga» (ama carrafta). Waxaan lahaan jirney xeerar iyo aragti aqooneed oo aan ku garanno kulana dhaqanno, dabeecadda aan ku dhex nool nahay iyo dadyawga kale ee dunida. Waxaa nalagu yiqiin weligeen geesinimo, Soomaalida looma soo dhowaan jirin. Waxaa nalagu yaqaaney xushmad, martigelin, hawl karnimo, adkaysi, gobannimo iyo akhlaaq. Sidaas awgeed, waxaan ahayn ummad isku filan, isku kalsoon, is-aqoonsan, oo dhaqankeeda iyo taariikhdeeda ku faanta.

**Gumeysiga Dhaqanka**
**Ka taariikh fogin,**
**Ka dhaqan fiicnin oo**
**Ka suugaan ballaarnin.**

Gumeystayaalku markii ay yimaadeen waddankeenna, waxay arkeen in aan ka taariikh fog nahay, ka dhaqan fiican nahay, oo ka suugaan ballaaran nahay. Wuxuu arkay isticmaarku inay adag tahay in la haysto dad intaas oo dhan kaga wanaagsan. Sidaas awgeed, wuxuu ka shaqeeyey inuu dhaqankeenna iyo taariikhdeenna dooriyo. Wuxuu ku tallaabsaday inuu taariikhdiisa ku beddelo teenna, dhaqankiisa ka weyneeyo keenna, Afkiisa ka hormariyo keenna, suugaantiisa ku beddelo suugaanteenna, iyo inuu diintiisa ku faafiyo waddankeenna oo ay noqoto diinta dawladda, teennuna ay noqoto tan dadka dambeeya (ama dabaqadda hoose).

Waxay inoo qurxiyeen afkooda, taariikhdooda, dhaqankooda, suugaantooda, dhulkooda iyo magaalooyinkooda. Afku, dhaqanku, taariikhdu iyo suugaantu ma aha hadal iyo sheeko iska socda, laakiin waxay sidaan : **Macne, barbaarin iyo falsafad ujeeddo leh**, oo wax ku aaminsiiya waxna ku diidsiiya. Waxay inoo weyneeyeen raggooda :

Wax qori jirey, gabiyi jirey, heesi jirey, oo wax sawiri jirey. Waxay nooga dhigeen raggaas oo dhan «Nabiyo» ay waajib tahay in la rumeeyo oo la raaco. Waxay na illowsiiyeen rag-

geennii kuwooda la midka ahaa. Waxay na jecleysiiyeen waddankooda, Magaalooyinkooda, iyo waxa laga helo iyo waxa lagu sameeyo, waxayna noo caayeen oo na nacsiiyeen waddankeenna, magaalooyinkeenna yo waxa laga helo ama lagu sameeyo. Waxay nagu xireen dhaqankoodii iyo dhaqaalahoodii:
dhaqankeennii iyo dhaqaalaheenniina waa naga gooyeen.

Gumeysigu ujeedduu ka lahaa «barbaarintaas». Ujeeddadiisu waxay ahayd inuu inagu abuuro caqliyad, shucuur iyo dhaqan jeclaada gumeysiga oo aan ka dhidhiyin xumaantiisa iyo dulligiisa, si uu u fuliyo ujeeddadiisa dhiigmiiradka ah.

Gumeysigu wuxuu xooggiisa isugu geeyey inuu duufsado dhallaanka yar yar iyo dhallinyarada soo kacaysa.

Wuxuu sameeyey barnaamijyo isugu jira :

**Waxbarid, Barbaarin** iyo **aqoon guud.** Wuxuu keenay kutub, Macallimiin, aflaam, joornaallo iwm. Barbaarintaaas cusubi waxay ka buurtay magaalooyinka waaweyn da' (fac) cusub oo nuguur (dabci) qalaad leh. Da' ka fongaran mujtamaca, ka fiigsan dhaqankeeda, ka fog suugaanta iyo taariikhda ummaddeeda, oo ay la fool xun tahay nolosha dalkeeda iyo magaalooyinkeeda. Da'daas waxaa loo qurxiyey waxbarashada, afka, dhaqanka, taariikhda, suugaanta iyo nolosha waddamada gumeystayaasha. Markii dambena, waxaas oo dhani waxay noqdeen hanka dhallinyarada iyo waxa ay higsadaan oo ay jecel yihiin inay gaaraan maraan. Dalkooda iyo dadkoodana waxaa looga dhigay inay yihiin wax dambeeya, khashiin ah, oo fool xun. Siyaasadda dadka lagu dhaqan guuriyo laguna koriyo waxaa loo yaqaan: Gumeysiga dhaqanka, waana kan ugu xun.

**Maxay Abuurtay Barbaarintaasi ?**

**«Guntinta Islaweynaanta»**

Barbaarintaasi waxay keentay oo abuurtay dhawr dhibaato (Nuqsaan) oo waaweyn, marka hore waxay abuurtay da' (fac) daba go'an oo aan waa hore lahayn, oo dunida dhaqankeeda iyo taariikhdeeda marti ku ah! Da'aan lahayn

dhaqan 1aad, Af 1aad iyo taariikh 1aad, laakiin intaas oo dhan marti ugu ah dad kale oo aynan isu dhoweyn, dhalasha ahaan, dhaqan ahaan, iyo taariikh ahaanba. Dhaqankooda 1aad, afkooda 1aad, iyo taariikhdooda 1aad ay yihiin kuwa shisheeyaha.

Marka labaadna, waxay abuurtay dhaqaale fadhiid ah, naafo ah, ooaan dheellitirayn, oo u qorshaysan inuu tuukuleeyo (Kaalmeeyo) dhaqaalaha shisheeyaha.

Marka saddexaadna, waxay abuurtay «guntin» (Cuqdo) ah «**ISLAWEYNAANTA**» qof waxayna dishay «**ISLAWEYNAANTA**» Ummadnimada.

Guntita «**ISLAWEYNAANTU**» waxaa weeye inay kula fiicnaadaan oo kula weynaadaan **wax kasta oo aadan lahayn,** wax kasta oo aan dalkaagu lahayn. Waxay tahay in dadyawga kale waddamadoodu kula fiicnaadaan oo kula weynaadaan, in dhaqan dad kale kula fiicnaado oo kula weynaado, in dhaqaale dad kale kula qurux badnaado oo kula badnaado oo aad u hanqal taagtid oo aad raalli ka noqotid inaad ahaato miskiin ag «Unuunufa» oo aan sharaf lahayn, adoo u malaynaya in dalalka kale ay samaysan karaan dhaqaalahaas, adiga iyo dadkaaguna aynan gaari karin; in aqoonta iyo dadka aqoonta leh ee dadwayga kale kula weynaadaan, kuwaaguna kula liitaan; in geesiyaasha iyo madaxda dalalka kale kula haybad bataan, kuwaagana aad quursatid. Guntinta, ama cuqdada «Islaweynaantu» waa intaas oo dhan oo kula weynaada; dalkaaga iyo dadkaaga waxooduna ay kula xumaadaan.

Guntinta «Islaweynaantu» waa tan ugu xun — waa cudur khatar ah, —— waa aafo halis ah. Haddii ay ku haleesho gun bay kaa dhigtaa; marka afraadna waxay abuurtaa barbaarintaasi «fikir la'aan» iyo iswaa. In qofku iswaayo oo uu ismoodo inuusan jirinba, ama haddii uu jiro, inuu ismoodo inuusan wax tari karin, uusan fikir lahayn, oo uusan wax beddeli karin. Qofkaas oo kale waxaa lagu magacaabi karaa «maqane-jooge, dhullaawe, dhiiglaawe! ! dhurlaawe-Dhaqanlaawe ! ! !».

Waxyaalahaas oo kale waxay u keenaan mujtamaca fadhiidnimo (Stagnancy), daboollaan, iyo dullinimo meel ka-

sta kaa gala: dhaqaalaha, dhaqanka, siyaasadda, waxbarashada, nafsadda iyo maskaxda, marka dambena waxay dhaliyaan iswaa! —— is-aqoonsi waa!! Ummaddoo is-aqoonsanweyda oo ay isu malaysa, ama rumaysa, inay ummadaha kalo ka hooseyso, dabadeedna dhibaatooyinkaasi waxay keenaan culays nafsadeed, iyo cadaadis, gaar ahaan marka uu qofku dhex joogo dadyawga kale ee dhaqankooda iyo taariikhdooda ku faanaya. Qofku wuxuu u maleeyaa markaas in «meel laga haysto». Wuxuu isyiraahdaa: «meel baa layga haystaa»!. Laakiin ma ogi meesha iyo waxa i haysta! Run! Waa la haystaa, maxaa jira waa la dhaqan guuriyey — waa la dhaqan rogey. Meel kale lagama haysto ee waa la kala dhantaalay —— isaga iyo dhaqankiisa ayaa la kala duwey — waagiisii (taariikhdiisii) horena waa la aasay. Qofku sidiisaba, waa saddex qaybood: **shalay, maanta** iyo **berri.**

Shalay qofku waa **taariikdiisa,** maanta waa **dhaqadiisa,** oo berri noqonaysa taariikhda ubadkiisa, berrina waa waxaad maanta **samaysid.** Intaas oo dhan waxay sameeyaan dhaqanka yo taariikhda qofka ama ummadda, taasina waa aragtida fikradda Iskaa Wax U Qabso.

Culayskii, cadaadiskii iyo caradii daahsoonayd ee raagtey waxay saameeyeen dadweynaha oo dhan: cadaadis, caro iyo ciil taagey waxay keenaan weligood, ugu dambeysta, qarxasho! dillaac! Kacaan!! Markii in badan cadiidiiskaas nalagu hayey ayaa dadweyneheennu is-haysan kariwaayey: Tawrad buuna sameeyey: Tawradii 21 Oktoobar, 1969kii.

Kacaanku fikrado cusub buu keenay. Waxaa ka mid ahayd «fikradda Iskaa Wax u Qabso».

Iskaa Wax U Qabso waa fikrad iskeed uga soo dhex baxday dadweynaha Soomaaliyeed: dhaqankiisa iyo taariikhdiisa. Waxay u soo baxday inay daaweyso dhibaata kasta, ayna soo celiso sharafta, haybadda iyo xorriyadda ummadda.

Iskaa: Waxay taabanaysaa meel kasta oo nolosha mujtamaca ah, nolosha mujtamacu waxay ku dhafan tahay dhaqanka mujtamaca. Aragtid Iskaa. waxaa weeye in dhaqanku

yahay muraayadda ummadda, haybaddeeda, qiyaasta ilbaxnimadeeda iyo garashadeeda, asaaska xorriyaddeeda iyo madaxbannaanideeda.

Hybaddu, garashadu, ilbaxnimadu, xorriyaddu iyo madaxbannaanidu waxay dhaliyaan aragti (garasho) mujtamaca lagu dhiso oo horumar keena iyo han ku gaarsiiya horumarka aad doonaysid. Iskaa. Waxay ina baraysaa: iyadoo ah dhaqan gelinta mabda' Hantiwadaagga Cilmiga ah hadba inta heerka garashadaadu (dhaqankaagu) joogo iyo inta hankaagu gaarsiisan yahay ayaa horumarka dhaqaalahaagu la socdaa (gaaraa). Haddii aan si kale u niraahno, dhaqalaha waxaa xukuma dhaqanka ummadda. Haddii dhaqanka la shaasheeyo ama uu fadhiid noqdo, dhaqaaluhuna waa shaashoobaa oo fadhiid buu noqdaa.

Gumeysigu markii uu na haystey wuxuu shaasheeyey dhaqankeenna, dhaqaalaheennuna waa shaashoobey waxaan ahayn faqri.

Hadda dhaqankeennu waa xar biyo leh, dhaqaalaheennuna wuu ka cabbayaa.

Xorriyadda dhaqanku waxaa weeye xorriyadda qofka iyo ummaddiisa. Qofka xorta ahi wuu ku faana qofnimada naftiisa oo wuu is-aqoonsada. Waa kan ku faana ummaddiisa iyo dhaqankeeda. Iska Wax U Qabso waa is-aqoonsi ummadnimo iyo qofnimo. Waa inaad ku faantid Afkaaga, Dhaqankaaga, Suugaantaada, Taariikhdaada, Waddankaaga iyo Magaalooyinkaaga, oo aad ku dadaashid inay ahaadaan kuwa ugu fiican. Si aan u hirgelinno is-aqoonsiga ummadnimo oo ku fadhiida mabda'a Hawl iyo Hantiwadaag waxaan samaynay «Kacaanka Dhaqanka iyo Aqoonta».

Gumeysiga dhaqanka waxaa keenay sababa badan oo la mid ah kuwa uu gumeysigu ku addoonsado dalal kale sida: gumaysiga siyaasadda amaba taliska xukunka waddan leeyahay oo waddan kale la wareego isagoo tabar iyo taagba isticmaalaya.

Xukunkaan lala wareegay waxaa loo talinayaa dhaqaalaha, tacaliinta, iyo wax kasta oo dalkaasi leeyahay.

Dawladaha reer Yurub markay soo galeen qaaradaha Afrika, Aasiya iyo Ameerika, waxay ugu yimaadeen shaqaale jaban, alaab ceeriin iyo iyagoo suuq u raadinaya badeecadahooda.

Tartankii imberiyaaliyaddu wuxuu u keeney dawladihii la gumeystey dhibaatooyin badan oo ay ka mid yihiin:

1) In gumeysigu meel kasta oo fura u ah dhaqaalaha gacanta ku hayey.
2) Inuu ticliintiisa ka hirgeliyo si uu dantiisa ku gaaro oo tii dalkaas tirtiro.
3) In dadkaas dhaqankooda uu dooriyo oo uu kiisa ku beddelo.
4) Inuu ka guursado dumarka, si uu u dhalasha dooriyo waddammadaas.
5) In xarumaha diiniga ah ee gumeysigu leeyahay lagu aruuriyo dhallaanka yar yar ee dalkaas u dhashay, iyaga oo halkaas diintooda lagu doorinayo, dhaqankoodii hooyana lagu beddelayo.
6) Waxaa jirtey kooxdii nabadda (peace corps) oo dadkeeda lagu soo tababari jirey dugsiyo u gaar ah.

Gumeysiguna wuxuu ugu tala galay inuu geeyo wadamaddii uu gumeystey isagoo u muujinaya iney ka qayb galaan horumarinta dalkaas dhinaca waxbarashada, caafimaadka, iwm. Runtuna ay ahayd in looga dan lahaa inay dhaqan rogaan dadka waddammada la gumeystay ku nool. Kooxdaasi waxay ku dadaashay inay kharibaad badan soo dhex geliyaan dhallinyarada weli garaadkeedu cayriin yahay, waxay fara geliyeen arrimaha diinta ee dalkaasi leeyahay, iyagaoo doonayey inay midda ay iyaga ku dhaqmaan faafiyaan.

Waxay ilbaxnimo ka dhigeen nadaafad la'aanta iyo dharka oo Sifool xun (karkar leh) loo tosho, timaha oo aan la shanlayn oo ragga iyo dumarka la kala garan waayo.

Hadalla iska dheh ah oo uu qofku xishoodkii iyo xurmadii uu kaga tegayo. Halkaas ayaa mujtamicii oo dhan wuxuu noqday mid wareersan oo an aqoon jidka uu dantiisa caamka ah ku gaari lahaa.

Arrimahaas oo dhan ayaa waxay keeneen in uu gumaysigu dhaqan, dhaqaale, diin, tacliin iyo maskaxdiiba uu ka

gumeystey dalalkii uu qabsaday. Kacaankii 21Okt. wuxuu durbadiiba ku dhaqaaqay inuu dalka Soomaaliya ka cayriyo kooxdii nabadda (peace corps), si uu u badbaadiyo dhallinta Soomaaliyeed.

Waxaa kale oo xoog la saarey in dhaqaalaha dalka la toleeyo oo la qorsheeyo. Waxbarashadii gumeysigu hubka uga dhigtey inuu maskaxda ummaddeenna ku dhaqo waddanka gudihiisa iyo dibaddiisa intaba, waxaa kacaanku ka dhigey mid danaha guud ee dadweynaha u adeegeysa. Barnaamij dheer ayaana arrintaa loo dejiyey, iyadoo lagu hirgelinayo fikradda Iskaa Wax U Qabso.

Dagaalka lagu qaaday gumeysiga dhaqanku waxtar weyn ayuu u keeney dadkeenna iyo dalkeennaba. Fikradihii xumaa ee gumeysigu maskaxda dadka ku beeray, waxaa lagu beddelay fikradaha cusub ee kacaankeenna hantiwadaagga ah.

Hanuuniska ballaaran ee meel walba ka socda tan iyo intii kacaanku curtay waxaa lagu hirgeliyey Iskaa Wax U Qabso.

Qorista Af Soomaaligu wuxuu suura geliyey in hiddaheenii la soo nooleeyo oo ay tacliintu noqoto mid leh dhadhan Soomaaliyeed. Sidaas darteed ayaa la mideeyey manhajka dugsiyada oo idil markii la toleeyey dugsiyada dhammaantood.

Go'aannadii madaxda waddanku ay u soo saartay arrimahaas, waxaa lagu hirgeliyey Iskaa Wax U Qabso.

Weyddiin :

1) Si Kooban u tilmaan macnaha guud ee Iskaa Wax U Qabso.
2) Maxaa loo yiqiiney waddanka Soomaaliya? Maxaase magacyadaas loogu bixiyey?
3) Sidee buu gumeysigu isugu dayey in uu dooriyo dhaqankeenna?
4) Waa maxay ujeeddooyinka uu gumeystuhu ka lahaa Barbaarinta cusub ee uu la yimid ?
5) Mamay guntinta (cuqdo) islaweynaantu u tahay cudur khatar ah?
6) Iskaa wax u qabso waa fikrad taariikh dheer ku leh dhaqanka Soomaaliyeed, haddaba maxay daaweysaa?

Casharka Lixaad

## I) KACAANKA AQOONTA IYO DHAQANKA

### Maxaa looga jeedaa ? Kacaanka dhaqanka iyo Hiddaha

Waxaa jirta waxyaala badan oo ay dadku ku dhaqmaan, noloshoodana raad weyn ku leh, waxyaalahaas oo marnaba aan faa'iido u lahayn iyaga, loona baahan yahay in la hagaajiyo haddii ay suuro gal tahay, haddii kale la cirib tiro. Haddaba kacaanka aqoonta iyo hiddaha, waxa loola jeedaa, in dadka maskaxdooda laga tirtiro waxyaalaha aan runta ahayn, faa'iidana aan lahayn, dhibaata mooyee. Sida caadooyinka xun xun oo ay ka mid yihiin :

1) Qabiilka keena dagaalka, kalatagga, isnacaybka, xaasidnimada, dibudhaca iwm.
2) Khuraafaadka oo ka mid ah cudurrada bulshada sida, mingiska, booranaha, wadaaddaha, faalka iwm.
3) Fadhiidnimada sida, caajiska, waayo sugidda, fikrad iyo dhaqadhaqaaq la'aanta.

Kacaanka aqoonta iyo hiddaha waxaa ka mid ah :

1) Baabi'inta fikradaha dibusocodka ah oo ay bulshadu ku dhaqmi jirtey iyo dadka oo lagu abuuro fikrado cusub ee horusocod ah, oo la doonayo in lagu dhiso bulsho caafimaad qabta.
2) Dadka oo la jeclaysiiyo shaqada, lana garansiiyo in ay shaqakasta fiican tahay, sharafna tahay, qabashadeeduna waajib tahay.
3) Dhaqanka iyo hiddaha oo la soo nooleeyo, lna cusboonaysiiyo, lagana dhigo mid ka shaqeeya fidinta iyo hirgelinta ujeeddooyinka Kacaanka hantiwadaagga ah.
4) Fanka : heesha, gabayga, riwaayadaha oo loo isticmaalo fidinta mabaadi'da cusub iyo ceebaha bulshada daaweyntooda.
5) Oloolayaashii aynu sameynay dhammaantood, mahrajaanadii dhallinyarada, iyo meelaha ay fasax-shaqo ku qaataan (ceel Jaalle) waxaa weeye kacaan loola jeedo in lagu beddelo fikradaha xun xun, laguna dhaqaajiyo dadka maskaxdooda iyo muruqooda.

Kolkii aynu isu soo ururino Kacaanka aqoonta iyo dhaqanka, waxa weeye in la beddelo aragtida xun ee beenta ah ee aynu u arkeynay arrimaha qaarkood, laguna beddelo aragti cad, run ah, cilmi ah oo ina tusaysa dhibaatooyinkeena, ina bareysana sidii aynu u daaweyn lahayn.

«Barashada afka Hooyo iyo fidintiisa waa inay barbar socotaa aqoonta dadweynaha oo la kordhiyo khaas ahaan dhinaca aqoonta cilmiga ah ee ummadda Soomaaliyeed ay aad ugu baahan tahay.»

**Jaalle Siyaad**

## KACAANKA AQOONTA IYO DHAQANKA SIYAASAHA LAGU HIRGELINAYO

Ciribtirka aqoon darridu waa arrin ay dad badani ku dadaalaan inay ka sal gaaraan. Maxaa yeelay aqoon darridu waxay tahay cudurka cudurrada bulshada ugu daran, waxay wax u dhintaa dhaqaalaha waddanka iyo nolosha dadweynaha, waxayna ummadaha ka hor joogsataa inay ka faa'idaystaan cilmiga cusub iyo wixii horumar u keeni kara. Qofkii aan wax aqooni wax yar buu sameeyaa, qalabkuu ku shaqeyana ma dhowri karo, wax cusubna kuma soo kordhin karo shaqada iyo habka lagu kordhin karo wax soo saaridda.

1) Hirgelinta Af Soomaaliga

Qorista af soomaaligu waa arrin wax badan socotay, heerar badanna soo martay. Waagii hore gumeysigu ma oggolayn in la qoro afkeenna wuxuuna hirgelin jirey afkiisa.

Gobannimada markii la helayna talisyadii waddanka jirey, kacaanka Oktoobar ka hor, arrintaa waxba kama beddelin.



Taasina waxay keentay in dad yar oo afafka shisheeyaha wax ku barta mooye, dadka intiisa kale aynan wax qorin waxna akhriyin, sida keliya ee dadka aqoonta wax qorista iyo wax akhriska looga simi karaa waxay noqotay in afkeenna loo yeelo xuruuf. Sidaas daraadeed, dawladda kacaanka ahi waxay go'aan ku gaartay 21 Oktoobar in Af Soomaaliga la qoro. Si Afka qoraalkiisa loo hirgeliyo waxaa kaloo dawladdu go'aan ku gaartay :

1) In saddex bilood gudaheeda xafiisyada lagaga shaqeeyo.
2) In saddex bilood gudaheeda shaqaalaha dawladu ku bartaan, dawladda oo dhanna lagu maamulo.
3) In saddex bilood ka dib dugsiyada hoose la geliyo, uuna noqdo afkii wax lagu baranayey.
4) In hal sano gudaheeda dadka magaalooyinka dagga-ni qoraalka Afka ku bartaan, reer miyiguna ay ku bartaan sannad.
5) Arrimahaas oo dhan waa lagu guulaystay. Qoraalkii Aaf Soomaaliguna halkaas buu ku hirgalay.

**Ololahii qoris akhris la'aanta magaalooyinka iyo tuulooyinka :**

Ujeeddada ololuhu waxay ahayd in dadka deggan magaalooyinka iyo tuulooyinka oo dhan la baro qoraalka iyo akhriska afka. Kumanyaal arday iyo shaqaale ah baa ka qayb qaatay ololahaas. Dadka ay waxabarayeena waxay gaareen boqolaal kun oo qof. Xaafad walba iyo tuula walba waxaa laga sameeyey guddiyo maamula ololaha si dad badani ugu faa'idaystaan. Dadkii ka qayb galay ololahaas waa dad aan weligood waxna qorin waxna akhriyin.

Taasina waa tallaabo kacaan ah, wax badanna ka beddelaysa nolosha iyo aragida dadweynaha soomaaliyeed.

**III — Ololihii horumarinta reer miyiga :**

Markii magaalooyinkii iyo tuulooyinkii uu ka hirgalay qoraalkii af Soomaaligu, wuxuu kacaanku u soo jeesadey miyigii.

Ujeeddada ololuhu ma aynan ahayn in dadka la baro qoris iyo akhris keliya, ee waxaa la doonayey in aqoontooda guud kor loo qaado waxaa kaloo la doonayey in nolosha reer guuraaga iyo beeralayda wax laga beddelo oo la ilbixiyo. Sidaas daraadeed kumanyaal arday iyo macallimiin ayaa loo diray miyiga si ay dadaka wax u baraan waxna uga bartaan.

**IV — Hanuuninta dadweynaha :**

Hanuunintu waxay ka mid tahay waxyaalaha kor loogu qaadi karo aqoonta dadka. Markii dadka laga dhaadhicinayo ujeeddooyinka kacaanka Oktoobar ama wax looga sheegayo hantiwadaagga cilmiga ah iyo sida la doonayo inay noqoto bulshada cusub waxyaalo cusub baa aqoontooda ku korodha Aqoondarriduna ma aha qoris iyo akhris la'aan keliya.

Qoralka afka markii dadka la barayo isla markaas waxaa la baraa waxyaalo noloshocda ku xiran. Sidaas daraadeed qoraalka afku wuxuu saameeyey kacaanka aqoonta iyo hiddaha.

Meelaha lagu hirgeliyey hawlaha la xiriira kacaanka aqoonta iyo hiddaha, iyo siyaalaha loo fuliyey waxaa ka mid ahaa Golayaasha hanuuninta, dugsiyada, xarummaha dhallinyarada, xarunta Xalane, golayaasha hiddaha iyo dhaqanka, ololayaasha, mahrajaannada, raadiyaha, wargeysyada, aqoon isweydaarsiga iwm. Kacaanka 21 Oktoobar kaddib meelaha iyo siyaalaha aan soo sheegnay waxay ahaayeen kuwo lagula dagaalamo fikradaha xun xun ee dibusocodka ah, ee bulshada Soomaaliyeed baday dibudhac. Waxay ahaayeen kuwa lagu fidiyo fikradaha horusocodka ah laguna hanuuniyo dadweynaha, laguna tuso wadada runta ah, si loo abuuro bulsho cusub, horusocod ah oo caafimaad qabta.

**Weyddiin :**

1) Maxaa loola jeedaa Kacaanka aqoonta iyo hiddaha? Tusaale inoo sheeg.
2) Sidee bay cudur u tahay aqoon darridu ?
3) Wax inooga sheeg meelaha iyo siyaalaba lagu fuliyo Kacaanka aqoonta iyo hiddaha.
4) Maxay keentay qoris la'aanta afkeennu Kacaanka ka hor ?

Casharka Todobaad

## SINNANTA DUMARKA IYO RAGGA:

Halgan dheer ayaa dumarka adduunku soo mareen, welina waa ay ku jiraan halgankaas, si ay ku helaan xuquuq buuxda oo ay kula sinnaadaan ragga.

Arrintaas haddaynu dib u baarno, waxaynu arki karnaa in sinnaanta dumarka iyo raggu ay lagama maarmaan u tahay nolosha bulshada. Maxaa yeelay dumarka iyo raggu iyagoo wadajira ayey iska kaashanayaan dhismaha horumarinta nolosha bulshada.

Sinnaantu ma aha in dumarku ama raggu ay ka tagayaan kaalintooda dabiiciga ah ee waxa weeye in qof walba uu xaqiisa Aadaminimada ah leeyahay, isagoo ku dadaalaya inuu kartidiisa, waaya aragnimadiisa iyo aqoontiisa wax ugu taro bulshada uu ku dhex nool yahay.

Halkaas oo lagu muujinayo is xilqaan, xilkasnimo iyo xaqdhawr guud, oo dadka ka dhexeeya.
Sinnaantu ma aha in dumarku ka tagaan dadnimadooda iyo waajibaadkooda uu qoysku uga baahan yahay, sidoo kae sinnaantu ma aha in raggu ay ka tagaan waajibkooda qoyska ka saarnaa, ee sinnaantu waxaa weeye in ninka iyo naagtu ay wada tashadaan oo ra'yiga is weydaarsadaan sida ugu habboon ee wax loo wada socodsiin karo, iyadoo aan qofna talada keligiis gooni u goosanaynin ee la is tixgelinayo. Sbabtoo ah ninka iyo naagtu waa laba xubnood oo aan kala maarmi karin.
Haddii xubin la quudhsado ama la xaqiraba, waxaa imanaysa in xubinta kale wax ka maqan yihiin amaba ay dhiman tahay. Haddiise labada xubnood ay isla jiraan oo ay iskaashanayaan, waxay yihiin xoog iyo tabar adkeysi u leh dhibaatooyinka nolosha ee ka hor imanaya.

Sinnaantu waxa weeye in ragga iyo dumarku ay u siman yihiin shaqada, waxbarashada iyo wax kasta oo waxtar u leh bulshada.

Waa inay qayb weyn ka wada qaataan maamulka siyaasadda, dhaqaalaha oo ay wada qaybsadaan khayraadka dalka laga soo saarayo, iyagoo qof walba lagu abaal marinayo shaqada uu qabtay inta ay le'egtahay.

Sannadku markuu ahaa 1910kii 8dii Maarso ayaa markii ugu horraysey la aqoonsaday xuquuqda dumarka, taas oo ah in ragga iyo dumarku ay isku mid yihiin, inay isku waxtar yihiin, inay isku xuquuq yhiin, inay isku aqoon yihiin, iskuna aragti yihiin.

Aqoonsiga xuquuqda dumarkuse weli heerkii lala doonayey ma gaarin meelaha badan ayaa waxa jira fikradihii qaldanaa ee dumarku laga qabey.

Fikradhaas qaldan ayaa weli lagula dhaqmaa. Sidaas daraadeed ayey dumarku aynaan weli ka soo gaarin meela badan meeshii ay xaqa u lahaayeen.

Xilliyadii taariikhda bulshadu ay soo baxday, haddaan dib u raacno waxaa noo muuqanaysa inuu jirey waqti dumarku ay ka gacan sarreeyeen ragga oo xaquuqda raggu hooseesey, waqtigaana maamulku dhinac kastaba waxaa gacanta ku hayey dumarka.

Isbeddelkii xilliyada taariikhda mid ka mid ah ayaa raggu la wareegey gacan sarrayntii iyo maamulkii guud ahaanba. Taas oo caddayneysa in taariikhda nolosha iyo habka bani-aadamku ku dhaqnaaba ay is beddelayeen oo aynan meel keliya yuuririn.

Sinnaata ragga iyo dumarku waxay la socotaa habka uu mujtamac kastaa ku dhisan yahay oo ku dhaqmo iyo mabaadi'da uu qaato.. Kacaankii 21kii Oktoobar isagoo wakiil ka ah ummadda soomaaliyeed ayuu si buuxda u aqoonsaday midnimada iyo wax tarka dumarka soomaaliyeed, isagoo tirtiraya xaqdarradii iyo ciriirigii ay ku jireen. «Haweenku waa xoog uusan garan karin qofka maangaabka ahi, waxayna yihiin gaar haye qiimo weyn leh». Waxaa yiri Jaalle Siyaad.

Dumarka soomaaliyeed waxay si cad u garteen fikradda muhiimaka ah ee Kacaanku wax badan ku dadaalay inay ummadda Soomaaliyeed si fiican u wada gaarto, taas oo ah inaan ummadda Soomaaliyeed u qaybsami karin koox la yiraahdo wax tar ma laha (Dumarka) oo meel iska fadhida iyo koox wax kasta iyadu gaar isu siisa (Rag).

Dalalka hantiwadaagga ah sinnaanta ragga iyo haweenku way ka muuqataa meel kasta. Waxay ka muuqataa xuquuqda loo leeyahay tacliinta iyo shaqada, waxay ka muuqataa doorashada uu qofku dooranayo meesha uu ka shaqaynayo. Waxayna ka muuqataa dheefta iyo abaalmarinta shaqada laga helo, waxay ka muuqataa maamulka dawladda guud ahaanba.

Marba haddii aynu qaadannay hantiwadaagga cilmiga ah, aynu nahayna ummad Islaanimadu ku dheer tahay, waxaa waajib inagu ah in aan ilaalinno oo daafacno xuquuqda qof kasta uu leeyahay.

**Weyddiin :**

1) Maxay tahay sinnaanta dhabta ah ee ragga iyo dumarka ?

2) Goormaa la aqoonsaday xuquuqda dumarka ?

3) Kacaankii 21kii Oktoobar sidee buu u hirgeliyey sinnaanta ragga iyo haweenka ?

4) Sidee bay uga muuqataa sinnaanta ragga iyo haweenku habka Hantiwadaagga ah ?